

BAADIGOOBKII RUUXDA

Sheeko Gaaban

Waxaa qoray; Cali M. Diini

BAADIGOOBKII RUUXDA

Haddii falsafaddu tahay jacaylka xikmadda, akhrisku waa xikmadda qudheedi.

1

Sida Tolstoy inoo sheegay, dhammaan sheekooyinka waawayn ee suugaantu waa labo midkood; *“nin sadcaalaya ama galti degmada soo galaya/all great literature is one of two stories; a man goes on a journey or a stranger comes to town”* balse aniga sheekadaydu waa labadaba; sadcaal dheer oo aan akhris la'aanta iyo jahliga kaga fakanayo, iyo isku kakabinta dunida aqoonta taa oo aan summadlaawe ku ahay. Si walba oo aan isugu kakabiyo dunidaa aan galtiga ku ahay haddana waxa aan dareemayaa in aan weli ahay dibadjoog marti ah, maxaayeelay wax badan ma aanan akhrin tacliin la'i iyo kansho la'aan darteed, sidaa daraaddeed baan dambi u galay si la ii xiro, si aan akhriska uga wabxo. Faldambiyeed aan u bareeray baan falay si la ii xabbiso oo jeelka la iigu dhaadhiciyo. Haa, in la i xiro oo gu'yaal badan oo noloshayda ka mid ah aan gudaha xabsiga ku qaato ayaan doonay. Haa, xabsiga ay dadku ka baqaan ee ay Eebbe ka magangalaan baan anigu lugahayga si kutalagal ah ugu raadsaday. Ujeedkayguna mid qur ah ayuu ahaa, si aan buugaag badan u akhriyo. “Xabsi gudihii un baad akhriska kaga dhargi kartaa,” ayaan naftayda u sheegay.

Jacaylka aan u qaaday akhrinta waxii uunku qorayay tan iyo jeerkii bini'aadanku ibafuray sirta dhigista awgeed baan faldambeed u falay si la ii xabbiso.

Maalintii dadku wax qorista hal'abuuray, maalintaa ayaa dadku noqday maamulaha qur ah ee koonka. Maalintaa ayaa dadku noqday kelitaliyaha koonka, noolaayaasha iyo manoolayaasha kale oo dhanina milkiyaddiisa noqdeen uu sidii uu doono ugu tagrifalo. Maalintaa ayaa carra'edag guud ahaantiiba ninkii aan wax qori aqoon akhrinna karin ka mid noqday duunyada kan wax qori kara waxna akhrin kara. Aniguna maalintii aan wax akhrinta bartay baan badaday oo ogaaday in kolkaa ka hor aan ka mid ahaa milkiyadda inta wax akhrin karta waxna qori karta.

Akhrisku waa caado aan qabatimay aniga oo barbaar ah, waayo, halkii aan ku dhashay kuna barbaaray dadku wax ma akhrin karin. Hooyaday waxba akhrin karin wax qorisna haba sheegin. Weligeedba hooyaday xaraf looma xarriiqin oo xataa Faataxada ay ku tukan jirtay waa ay bawsatay. Aabbe qudhiisu wax qumman hooyo ma dhaamin, keliya magaciisa “Maxamed” ayuu loorka raashinka ah ku dul qoran karay. Berigii la qaaday ole'olihii *bar ama baro* ee reer miyiga lagu barayay qorista far Soomaaliga ayaa arday Xamar laga diray aabbe oo xoolihiisa foofsanaya miyiga u tageen. Halkaa ayuu ku bartay sida magaciisa loo qoro, balse ma hubo in wax u dheeraayeen oo uu magaciisa wax dhaafsan qori karay. Kolley si wanaagsan buu magaciisa jawaanka bariiska ah ugu dul xardhi jiray.

Intii aanan magaalada imaan waxa keliya ee aan qori karay akhrinna karay Af Carabiga ayuu ahaa, khaasatan Qur’aanka, kaa oo aan dugsii Qur’aanka iyo mawlicii xerta ku soo bartay.

Markii aan magaalada imid ee aan bartay akhriska iyo qoraalka afkayga hooyo ayaan ku baraarugay in aniga iyo dadkaygu aan ku jirno Bohoshii Balaato. In aan duni mugdi ah ku nool nahay balse aynaan dhaadin. Maalintaa ka dib waxa aan galay halgan sidii aan qaxaabta mugdiga ah uga bixi lahaa. Waxa aan bilaabay akhrinta wax walba oo qoran oo aan kicin karay.

Markii aan qurbaha imid ee Af Ingiriisiga xoogaa ka bartayna irdo hor leh baa ii furmay. Buug walba oo aan akhriyaaba waxa uu ii furaa irid cusub iyo duni hor leh oo aan moogganaa. Baal walba oo aan rogaaba waxa uu i tusaa jahliga iyo mugdiga aan ku sugan ahay.

2

Markii aan magaaladan Perth imid, waxa aan la amakaagay sida caadada akhrisku dadka dalkan u biyadhigtay nololmaalmeedkoodana uga mid noqotay. Waxa aan la anfariiray heerka sare ee tirada dadka dalkan ee wax akhrin karta waxna qori karta. Waxa aan la indhadaraandaray goobaha akhriska ee xaafad walba ka gawriira, halkaa oo aad ka heli karto buugaag jaad walba leh oo si bilaash ah aad ku akhrisan karto taa oo fursad ii siisay akhrinta buugaag aanan abidkay akhriyeen, haddii aan dhulkaygi hooyo ku negaan lahaa.

Markii aan Perth muddo gaaban joogay waxa aan shaqo ka helay gaadiidka dadweynaha ee magaalada oo aan baswade ka noqday halkaa oo aan maalin walba toban saacadood ka badan bas eryo, lix maalmood toddobaadkiiba. Saacadaha tirada badan ee aan baska saaran ahay waxa ay curyaamiyeen wax akhriskaygi anigana jir ahaan iyo maskax ahaan bay i daaliyeen. Markii aan baska ka dego aniga oo baralaati ah ayaan qolkayga galaa ka dib na sariirtaan ku gataati dhacaa, halkaa oo aan bilqanaado ilaa shiftiga xiga laga gaarayo. Horay haddii aan toddobaad walba hal buug ka laaci jiray imminka buug aan boqol baal ka badnayn baan bil dhan dul yuuraraa. Toddobaad walba marka mushaarku ii dhaco hal buug ama ka badan baan soo iibsadaa ilaa ay qolkaygi buuxdhaafiyeen boqollaal buug oo aanan akhrin. Markaa ayaan shaqadii nacay anigiina isnacay. Ogow in aad isnacdid waa silic iyo saxariir adduunyee. Ogow qof isnacay waa qof nolosha loo dacareeyaye. Yeelkeede, si walba oo aan shaqada u nacay aniguna isu nacay haddana dookh kale ii ma furnayn, waayo, shaqadani cido dhan bay nolol u tahay. Haddii aan joojiyo reero dhan baa dabku ka damayaa. Sidaa daraaddeed baan sabirka dugsaday aniga oo mar walba eedda saarayaa hannaanka shaqo ee dalkan iyo guud ahaanba reer galbeedka kuna eedaynaya in ay dalkaba ii keeneen in ay igu xammaashaan oo keliya, *modern slavery*. Marna intaan dib u eego dalkii aan ka imid, baahidii, baaskii iyo shaqo la’aantii yaallay baan is dhahaa “Alla maxaad abaallaawe tahay.” Mar kale waxa aan nafta ku sasabaa aragtii Arthur Schopenhauer ee ahayd *silicu waa awoodda togan ee nolosha/suffering is the positive force of life*. Haddana waxa aan xusuustaa hadalkii Viktor Frankl: *Suffering is an eradicable part of life*. Waxa aan rumaystay, sidii Viktor ba rumaysnaa, in silica nolosha, jir ahaan iyo maskax ahaanba, laga ga tallaabsan karo ujeeddada nolosha oo la helo. Maalinta aad ujeeddada noloshaada heshid silica iyo saxiirta nolosha

adduunyadu kugu ma noqonayaan makaab kugu horgudban ee waxa ay kuu noqonayaan buundo aad webiga kaga tallawdo.

Akhriska iyo qoraalku in ay ujeeddada noloshayda yihiin baan helay. Haa, abuuristaydaba waxaa laga lahaa in aan akhriyo oo qoro. Inta aan akhrinayo oo qorayo ku nool baan ahay. Maalinta intaa aan waayo waan dhintay. Xataa haddii aan neefsanayo oo lugaynayo ku dhintay baan ahay. Sidaa darteed, waa in aan maro jid walba oo akhriska iyo qoraalku i la maraan. Xataa haddii ay god madow galaan waan ka dabagalayaa, waayo, kama hari karo. Inteen uga haraa? Meelna. Wax walba oo labadaa iga horistaagaya, sida shaqo, waan la dirirayaa oo ka takhallusayaa. Sidaa ayaan guntaday.

Saacadaha badan ee aan shaqeeyo waxa ay noqdeen cadowgii koowaad ee aan gulufka ku ekeeyay. Waxa aan iska xarrimay in aan shaqeeyo maalmaha fasaxa (Saturday and Sunday) iyo wax *overtime* sheegta oo dhan, Ilaahow may labaatan daqiiqadoodna ahaato. Xataa shiftiga aan ku qoran ahay haddii uu noqdo mid toddoba saac iyo bar ka badan waxa aan ka beddasha Hindi lacag u hamuun qaba. Hindidu waa ay i la yaabi jireen marka aan siiyo shifti toban iyo labo saacadood uga na beddasha mid toddoba saac iyo daqiiqado ah. Markii dambe maamulayaasha dhiboogu inta ay ka daaleen foomka shifti beddalista ee aan toddobaad walba u gaynayo ayay mar walba shifti gaaban igu qoraan. Inta aanan qodobkan shaqada ka tallaabsan ii oggolow in aan wax yar kaaga sheego sidii aan shaqada ku helay iyo waxa ay tahay baswadanimada Perth.

Maalin aniga oo baabuur cayrinaya ayaan dhankayga bidix ka arkay dhisme ballaaran iyo tabbeelle ka hor mudan oo ay ku qoran tahay *drivers wanted*. Intaan joojiyaha qabtay baan qortay nambar taleefan oo tabbeellaha ku qornaa. Dabadeed markii aan guriga tagay baan wacay nambarkii ayaguna waxa ay iimayl iigu soo direen foomamkii shaqada dhawr beri dabadeedna, waraysi shaqo iyo tijaabo caafimaad kolkii aan ka gudbay, waxaa la ii muddeeyay maalinta aan bilaabay tababarka shaqada. Labo toddobaad oo tababar baswadnimo ah ayaa la ii muddeeyay, ka gadaalna shaqo yar oo niic ahayd oo aan ka shaqaynayay baan inta aan fasax afar toddobaad ka qaatay Melbourne tamashle iyo dal barasho u aaday.

Labo toddobaad kolkii aan Melbourne gaalaabixinayay, aroor Isniinaad baan tababarkii baswadidda iska xaadiriya. Sagaal maalmood oo aan aroor walba tababarkaa u jarmaadayay maalintii todobanaad baa la ii geliyay yunifoom u eg midka duuliyayaasha diyaaradaha. Shaar cad oo labada garbood ku leh garaaddo madow oo kuwa duuliyayaasha aan laga soocin, luungadheere madow iyo kabo sookal madow oo kuwa xafiisyada loogu shaqo tago ah ayaa la iigu labbisay. Runtii markii aan dharkaa ku labbistay in aan duuliye ahay baan ismooday. Aan ku xusuusiye duuliyenimadu waa xirfad aan yaraantaydi ku hammin jiray laakiin markii aan waynaaday baan ogaaday in dalkayguba uusan diyaarado lahayn oo dhammaan diyaaradihii dalkaygu dagaalladii sokeeye ku basbeeleen. Runtii aad baan isugu bogay maalintaa.

Aniga oo aad ugu riyaqsan labbiskayga duuliyaha la i moodo iyo in aan tababarkii baswadanimada ku baramoosay baan shaqadii yarayd ee aan fasaxa uga maqnaa wacay u na sheegay in aanan ku soo noqon doonin. Sida xeerku yahay waxa ay ahayd in aan labo toddobaad oo ogaysiis ah siiyo inta aanan shaqada ka tagin, laakiin sow tii Bukowski yiri “*you cannot blame a man for wanting to better himself*” miyuu taa ku khaldanaa? Sida aan filayo maya.

Bas wadiddu waa shaqo dhib yar haddana dhib badan. Waa dhib yar tahay oo baska un baad kaxaynaysaa oo bas istaagyada dadku taagan yihiin baad istaagaysaa dabadeedna labada albaab furaysaa, marka dadku ku xaroodaanna inta aad xirtid dhaqaaqaysaa. Qofka markii uu degayo sidii Soomaaliya iyo Kiiniya oo kale kugu ma qaylinayo ee batoon ayuu riixayaa ka dib na dawan (bell) kursiga darawalka dhakadiisa ku dheggan baa si daran oo madax xanuun kugu ridaysa kuugu qaylinaya. Aad baan u necbaa dawankaa qaylida badan.

Shaqadani dhanka kale waa ay dhib badan tahay oo waxa aad arkaysaa jaad walba oo dadku yahay, tuug, iskoris nolosha ka dhacay, waayeel da'du garbadaubtay oo marka uu baska fuulayo saacad dhan gurguuranaya, cunsuri caddaanimadu madax martay oo midabkaaga ku xajiimoonaya, sakhraan khamri iyo daroogo kale ka soo dhergay oo meel uu u socdo iyo meel uu ka socdo aan garanayn, hooyo *single mother* ah oo ubad oohin badan dareerinaysa, xirfadle koodh iyo taay xiran oo daaraha dhaadheer ee magaalada ku degdegaya, iyo dalxiisayaal Eeshiyaan u badan oo aan aqoon meel ay u socdaan iyo af ay kugu la hadlaan toona. Mid baa waydiin waqti lumis ah kugu wareerinaya, *does this bus go to the city?* Markaa ayaad adiga oo uurka iska cuncunaya dhoollacaddayn aan laabta jirin oo ay *customer service* ku sheegeenna tusaya ugu jawaabaysaa *yes it does* adiga oo niyadda iska leh *no, it does go to Sydney. Are you blind? Don't you see or read?* Waayo, horay iyo geesta midigba waxaa baska kaga dheggan iskiriinno aad u waawayn oo muujinaya halka basku u socdo. Waxa aad dadkaa waydiimaha niicda ah ku wareerinaya niyad ahaan ugu canaanaysaa: *come on man! Don't you know that the government spent tens of thousands of dollars on those screens?*

Hal mid oo aan shaqadan ku jecel ahay ayaa ah in aadan dan iyo heello ka lahayn haddii rakaabka baska raacayaahi ay tigid haystaan iyo haddii kale, oo shaqadaadu bas wadid un tahay. Laakiin baswadayaal badan arrintan kuma baraarugsana oo waxa ay kansho iyo tamar badan ku bixinayaan hubinta tigidhada rakaabka taa oo marar qaarkood muran iyo gacankahadal ka dhex'oogta ayaga iyo rakaabka. Baswadayaashaasi miyaysan ogayn in dawladda *Western Australia* ay sannad walba gaadiidka dadweynaha ku kharashgarayso miisaaniyad boqollaal milyan oo doollar ah.

Kolkii aan joojiyay shaqaynta saacadihii tirada badnaa oo aan labo beri oo firaaqo ah helay baan akhriskii dib ambaqaaday oo aan dhexmaquurtay dunida ballaaran ee buugaagta dhex ceegaagta, muddo ka dib na waxa aan iska soo qoray, qaab hal gelin (*part time*) ah, jaamacad i aqbashay markii aan *ESL*-ka dhammeeyay balse aan ka saaqiday. Afar maalmood gelinka hore ayaan shaqeeyaa maalinta shanaadna gelinka hore jaamacadda ayaan tagaa gelinka dambena shaqada. Habeenka Jimcaha fiidka hore marka aan shaqada dhammeeyo inta aan kolkosha gashado buug aan xiisanayo ayaan iska xaadiriya maqaaxi Soomaalidu isugu tagto oo ku qayisho, turubka iyo dubnaddana ku dheesho, sidaa oo kale na shiishadda lagu cabbo.

Beryihii hore anigu ma qayili jirin ee shiishadda un baan nuugi jiray, laakiin beryo dambe ayaan qayilaadda bilaabay ka dib markii shiishaddu igu ridday hurdo badan oo aan wax ka akhrin

waayay. Waxa aanba ogaaday in qaadku yahay shidaalka wax akhriska iyo wax qorista, Soomaalidii u horraysay ee qayishaana ahaayeen culimo kutub daalacasho ku dhafraysa, laakiin goor dambe ay dadweynuhu qaadka barten si xunna u adeegsadeen ilaa qaadku noqday balwad Soomaalida naafaysay. Waxa aan ogaaday haddii aad hal ama labo majood un aad qaadka ka qaadatid inta aad ruugaysidna aad wax akhris ama wax qoris ku foogan tahay in qaadku ku siinayo tamar iyo dhiifoonaan aan caadi ahayn balse Soomaalidu aysan taa fahansanayn oo qaadka u ruugaan waqti lumin saacado farabadan oo ay qayilaad u fadhiyaanna ku lumiyaan fadhikudirir iyo sheekooyin maalaayacni ah. Sidaa oo kalena ay qaadka tiro xad'dhaaf ah ka cunaan, taa oo dhaqaale ahaan iyo caafimaad ahaanba dad badan u naafaysay.

Marka aan maqaaxida tago, sida saaxiibbaday Soomaaliyeed turub iyo dubnad u ma aan fadhiisto shirka fadhikudirirkana qayb ka ma noqdo ee waxa aan fadhiistaa gursi dabacsan oo gaaban oo dhabarka u roon miis gaabanina horyaallo, dhalo shiisho ahina dhinactaallo. Markaa ayaa kolka aan labo laanboqor qaniino shiishaddana dhawr jeer nuugo buuggayga la soo kala baxaa oo akhris ku bilaabaa, ama inta aan laabtoobka fidiyo *assignment* jaamacaddu iga sugayso qoraa. In qaadku tamarta akhriska yahay waxa aan xaqiijiyay markii aan isbarbardhigay labo *assignment* oo mid aan qoray aniga oo aan qayilayn midda kalena aniga oo qayilaya. Tan qaad la'aanta aan qoray in aan ku dhaco ayaan ku sigtay halka tan aniga oo marqaamaya aan qoray macallinkii saxay dhibco sare igu siiyay.

Dhaqankaa gooni-fadhiga ah Soomaalidii kale ee goobta imaan jirtay waa igu qoonsadeen waxa ayna ii bixiyeen naanayso badan sida *Jaamac-Buugle*, *Barafasoorka*, *Jaamac-Buufis*, *ninka waalan* iyo magacyo kale. Yeelkeede, u ma aanan joojin hadalladoodana dhag u ma jalaqsiin. Halka ay aniga i la yaabban yihiin, lidkeeda waxaa iga daadegi waayay oo maankaygu qaadan waayay sida rag waawayni habeen oo dhan waqtigooda ugu lumin karaan qaad ruugis, iyo fadhikudirir qabyaalad ka duulaya qabyaaladna ku duulaya? Maxay ka dheefayaan? Waxaa taa ka sii daran, habeen walba, toddobaad walba iyo bil walba mawduuca fadhikudirirkoodu isma beddalo, waa qabyaalad iyo ka sheekaynta siyaasadda Soomaaliya, qaab iskahadal iyo kutirikuteen ah. Marka ay nin waalan iigu yeeraan baan aniguna niyadda iska dhahaa; *igu sheega nin waalan Bohoshii Balaato ayaad ku jirtaane*.

Qaadku dalkan Australia, gaar ahaan gobolkan galbeedka waa uu ka baxaa oo magaalooyinka dhexdooda ayaa geedaha qaadka laga helaa, Itoobiyaan badan oo Oromo u badanina beero qaadku ka baxo ayayba abuurteen oo toddobaad walba tobannan kun oo doollar bay Soomaalida aan ka midka ahay ka qaataan.

Kolkii aan dhawr gu' toddobaad walba labo habeen, Jimcaha iyo Sabtida, maqaaxidaa kalyanti ka ahaa Axadduna maalin nasasho iigu ahayd baan maalin jaamacadda ku bartay gabadh Soomaaliyeed. Subax aan jaamacadda ku jarmaaday ayaa aniga oo bun ka iibsanaya goob bunka laga iibsado oo jaamacadda ku dhextaal gabadhaa safka isla galnay.

“Ma Soomaali baa tahay?” ayay i waydiisay.

“Haa,” goortii aan ugu hadalceliyayna “ma jaamacadda ayaad dhigtaa mise waad dhigtaa?” ayay i haybisay. “Waan dhigtaa, ee adiguna ma ardayad baa tahay?” “Haa,” ayay iigu warcelisay. “Magacaa?” aniga ayaa waydiiyay.

“Muna,” adigana? Ayay igu tuurtay.

“Jaamac baa la i dhahaa abbaayo ee barasho wacan.” “Kansho ma hayo oo fasal baan ka daahsan ahaye marka aan xiisadda ka soo baxo ma is arki karnaa?” ayaan u sii raaciyay.

“Barasho wacan walaal. Haa, ee marka saacaddu intaa tahay halkaa iga soo raadi,” ayay igu macsalaamaysay.

4

Markii aan xiisaddii soo bogtay baan kobtii ay igu ballamisay abbaaray. Intii aanan gaarin halkii la igu ballamiyay baan Muna oo halkii fadhida sheedda ka arkay, dabadeedna inta aan moobeelka la soo baxay baan shaqadii wacay una sheegay in aan xanuunsanayo oo aanan shaqada inaan doonin. Maxaa ka macaan oo ka wacan in aad maalin Jimce shaqada ka maqnaatid. Jimce, Sabti iyo Axad aad fasax tahay, afartii majood ee qaadka ahaa ee Jimcaha iyo Sabtidu kuu ballansan yihiin, dhaladii dheerayd ee shiishaddu ku sugayso qalanjo jalaqsan oo Muna la yiraahdana ku sugayso maxaa ka wanaagsan? Dee waa waxba.

Kursigii ay fadhiday mid ka soo horjeeda inta aan salka dhigay baan in aan ka soo daahay uga cudurdaartay. “Dhib ma leh” markii ay igu tiri ayaan u holladay haybinta waxa ay barato laakiin, ayada ayaa “maxaad barataa? Ma master baa diyaarinaysaa?” iga ga naxsatay. “Waxa aan bartaa... een een... waa sheeko dheer, ma aqaan wax aan barto iyo waxa aan baranayo,” ayaa si dirqi ah oo kalsoonidarro ah iga ga soo baxay.

“Maxaad u la jeeddaa?” Muna ayaa i waydiisay.

“Waxa aan u la jeeddaa waxa aan barto ma garanayo, labo sano ka hor waxa aan jaamacaddan ka bilaabay barashada *Sustainable Development* balse samistarkii koowaad inta aanan idlayn baan nacay oo *International Aid and Development* ku beddalay haddana aniga oo aan samistarkii koowaaad dhammayn baa waxa aan ku beddalay barashada taariikhda Yurub taa oo aan imminka wado, balse taana imminka kuma niyadsami, in aan beddali doonana waa ay u badan tahay,” baan Muna ku iri.

“Oo walaal beddal baaba nafta kaa qaadaye maad mid un isaga adkaysatid? Muna ayaa i su’aashay.

“Muna abbaayo waa runtaa beddal baa nafta iga qaaday balse dareenkayga ayaan iga yeelanayn waqti ku lumis duruus aan iga daadegayn oo aanan jeclayn. Yeelkeede, arrintaydu waa tu gundheer oo ka sheekaynteedu waqti badan u baahan tahaye adigu maxaad barataa?” aniga ayaa Muna ku iri.

“Dissertation-kii Ph.D.-da ayaan qorayaa walaal,” baa Muna iigu jawaabtay. “Biomedicine Science ayaan bartay,” bay sii raacisay.

“Maashaa Allaah, Doctor Muna, waan kuugu hambalyaynayaa guusha aad tacliinta ka gaartay,” baan ku iri.

Dabadeedna marka ay hambalyadayda ka mahadnaqday baan sheeko guud iyo iswarsiga degmooyinka aan Perth ka deggannahay iska galnay. Ugu dambaynna maadaama aysan Muna baabuur wadanin kayga ayaan ku qaaday si aan gurigeeda u geeyo. Intii aan jidka ku sii jirnay bay waxa aan qabto i haybisay aniguna u sheegay in aan baswade ahay maantana aan shaqadii wacay oo u sheegay in aanan shaqayn karin.

“Maxaa kugu dhacay,” bay i waydiisay.

“Waan xanuunsanayaa.”

“Waan ka xumahay, Alle ha ku caafiyee sidee lagu hayaa?”

“Runtii ma garanayo si la ii hayo. Bal adigaa dhakhtar ahe maxay kula tahay in ay i hayaan” markii aan ku irina inta ay qosol la dhacday oo si xishood ku laran yahay hoos madaxa ugu foorarisay bay tiri “shaxaari funny ah baa tahay!”

“Kol haddii cudurka i haya aad garatay waxa ay sababayna waad garatay baan filayaa Doctor Munaay?” Baan ku tuuray.

“Maya, cudurrada bukaanka haya ma aqoonsanno ilaa aan shaybaar iyo baaritaan dheer marinno,” ayay isku difaacday.

“Xataa CT SCAN, i mari,” anigaa ku iri.

“Armaan xanuunno aanan dawayn karin kaa helaa?”

“Xanuun aadan dawayn karin maba jiro.”

“Xannuunada kuwo aanan dawayn karin baa jira.”

“Kolley kan aniga haya dawadiisa waad haysaa. Taa waan hubaa.”

“Laakiin sow macquul ma ahan aniga oo dawadii garanaya haddana in aanan dawayn karin?”

“Xeerka dhakhaatiirtu sidaa ma qabo.”

“Laakiin waxa uu qabaa in aan dhakhtar kale kuu diro.”

“Cudurkayga dhakhtar aan adiga ahayni ma dawayn karo dawadiisana ku ma bogsan doono.”

Annaga oo aan ku heshiin dawada cudurkayga ayaan soo hor istaagnay fillo saddex qol ah oo Muna keligeed deggan tahay. Waxa ay iga codsatay in aan guriga soo galo si ay shaah iyo qado ii siiso balse waxa aan ugu cudurdaartay in dameer xaabo iga la taagan yahay oo aan u degdegayo ha se ahaatee aan casirka dabadii shaaha iyo qadada soo doonanayo haddii ay suuragal tahay. In ay casirka meel ballan ku leedahay caawana ay aroos aadayso ayay ii sheegtay. Yeelkeede, inta aan nambarrada talefoonka kala qorannay baan ku ballanay in aan isa soo waci doonno dabadeedna ismacsalaamaynay.

Dameerka xaabada iga la taagan ee Muna casumaaddeeda aan uga degdegay wax kale ma ahan ee waa baadigoobka afartii majood ee qaadka ahaa. Horay waxaa afarta majood iiga rukunnaayeen nin Soomaali ah balse galabkan waxa aan afarta majood iyo ka badanba ka jirinayay guriga nin caddaan Australia ah oo horay iigu sheegay in gurigiisa geed qaad ahi ka baxo sidaa darteed marka aan qaad u baahdo aan geedkiisa ka soo guran karo. Ninkaa oo Jake lagu magaaco shaqada baska ayaan isku barannay. Markii aan baska bilaabay asaguna baswade ayuu ahaa laakiin goor dambe ayuu shaqada baska isaga tagey ka dib markii uu goobaha macdanta laga qado shaqo ka helay. Macdanta waxaa laga qodaa waqooyiga fog ee gobolka galbeedka Australia shaqaalahana diyaar baa shaqada gaysa halkaa oo ay toban iyo saddex beri ku sugnaadeen dabadeedna diyaarad baa dib guryahooda ugu soo celisa si ay toddobaad fasax u qaataan. Taa macneheedu waa in saaxiibkay Jake uu labo toddobaad Perth shaqo uga maqnaado dabadeedna hal toddobaad ayuu Perth fasax u yimaadaa. Sidaa darteed baanan kansho ugu helin in aan geedkiisa qaad ka soo gurto tan iyo markii uu ii sheegay, maadaama uu inta badan guriga ka maqnaa dhawr goor oo uu joogayna aan anigu haleeli waayay.

In aan qaadka cuno waxa uu ku ogaaday, galab baan garoonka diyaaradaha ka soo qaaday aniga oo qayilaya markii uu i waydiiyay waxa aan ruugayo ayaan u sharraxay geedka qaadka la dhaho, dabadeed labo beri ka dib buu guriga iigu yimid asaga oo bac wayn oo qaad ah walwaalaya ii na sheegay in geed gurigiisa ku yaalla uu ka soo guray. Waxa uu hubinayay in waxa aan cunayay, maalintii aan garoonka ka soo qaaday, iyo geedka guriga ka baxaa isku mid yihiin.

Saaxiibkay Jake oo markii iigu dambaysay ahaa doob gaamuray oo aan xataa saaxiibad (girlfriend) lahayn, kolkii aan iridda gurigiisi garaacay waxaa iga furtay gashaanti indha buluugley ah oo tu la qurux ah aanan abidkay arkin. Sidii qof i garanaya ayay igu tiri “hi Jama, I am Jane, how are ya? Welcome, come in.” Aniga oo xoogaa yara baygagsan baan gurigii galay dabadeedna qol fadhi qurux badani yaallo ayay inta ii horkacday markii aan saldhigtay inta kursiga iga soo horjeeda aadna iigu dhow fadhiisatay igu tiri “saaxiibkaa dukaanka ayuu adeeg ka soo qabanayaa ee geedka ma ku tusaa?” “Maya, maya, degdeg igu ma jiro ee aan sugno,” markii aan ku iri iyo albaabkii oo la soo furay baa kulmay.

Saddexdeeniba geedkii qaadka ahaa oo ku yaalla beer qurux badan dhir badanina ku beeran tahay oo qaybta dambe ee guriga ku taalla ayaan inta tagtay labo bacood oo qaad ah ka soo buuxinnay. Intii aan qaadka guraynay Jake waxa uu i baray saaxiibtiis Jane waxa uu na ii sheegay in ay dhawaan isguursan doonaan. Markii aan qaadkii gurnay baan inta Jake konton doollar siiyay kula na heshiiyay in mar walba oo geedkiisa aan qaad ka gurto konton doollar siin doono, asaguna sidii aan filayay waa uu oggolaaday, inkasta oo ay lamafilaan ku noqotay in aan konton doollar oo dhan ka siiyo caleenta iyo laamaha geedkiisa kaa oo uu dhawrkii biloodba mar gaabintiisa iyo qurxintiisa lacag ku bixiyo. Dabcan waxa aan maanka ku hayay dhaqanka caddaanka ah ee ah *ii dhiib aan kuu dhiibee, ama what’s in it for me*, iyo murtida Soomaaliyeed ee ah *gacmo isdhaafay bay galladi ku jirtaa*.. Sidaa oo kale qaadka aan geedka ka gurtay kana guran doono ayaa ahaa ku toban jeer ka badan inta aan cuni karo, sidaa daraaddeed kontonka doollar ee aan Jake siinayo iyo dhawr boqol oo kaleba waxa aan ka samaynayaa marka inta aan cuni karo maahane inta kale iibiyo.

Markii aan Jake iyo saaxiibtii Jane ka tagey baan iswaydiiyay sida Jake ku helay gashaanti sidaa u qurux badan. Waxaa ii muuqan waayay wax ay Jake iyo Jane isaga mid yihiin oo isku dooran karaan marka laga reebo xaraafaada iyo qaafiyadda magacyadooda. Xataa mucjisada aan dalkan ku arkay ee lammaanayaashu isu eg yihiin laga na sameeyay cilmiga la daraaseeyo ee *Familiarity Effect*, iyo *Empathic Mimicry* u ma malaynayno in ay Jake iyo Jane abidkood saamayn ku yeelan doonto oo xataa haddii ay kun sannadood isla joogaan isu ekaan doonaan.

Waxa aan iswaydiiyay waxa Jane ku dooratay Jake. Jake qurux ma leh; waa dhawr iyo soddon jir si qaab daran u dheer, calool wayn oo kelyo kuusan, dabo malaasan, lugo waawayn oo dalbo leh, garbo ballaaran haddana goobbo leh, madax wayn oo kor u yuban sidii duduntii, weji yar oo dib u riixan, indho yar yar oo xamil ah sunniyuhuna waawayn yihiin balse si u qaab daran yihiin, gooman fiican iyo daaman godgodan oo gar la'aan ah, qal hoos u dhuuban sidii mooyihii u na eg in uu dhanka bidix u qalloocan yahay; gacmo waawayn oo aad mooddid in ay ka dheer yihiin intii loogu talagalay iyo calacalo balballaaran oo farahooda aad mooddid in ay bararan yihiin; af ballaaran, ilko waawayn iyo dibno yar yar. Jake muuqaalkiisu waxa uu i xusuusiya hadal abtigay hadda ka hor ku yiri nin aan qaraabo nahay oo abuur ahaan aan Jake laga soocin. "Haddii aad rati ahaan lahayd waa lagu xaniinyo bixin (dhufaani) lahaa si geela firxumo laga ga ilaaliyo," ayuu abtigay ninkaa ku kala kaftamay subax aan wada quraacanaynay.

Jake waa nin xirxiran oo aan kaftan aqoon mar walbana aad mooddid in uu xanaaqsan yahay. In aad aragtid Jake oo qoslaya ama dhoollacaddaynaya waa naadir. Yeelkeede, sidiisa kale waa nin waanagsan oo miskiin ah.

Dhinaca kale, Jane waa dhawr iyo labaatan jir qurux idilkeed urursatay. Ma gaabna dherer saa'id ah na ma leh; labadeeda qaar waxaa xiriirinta dhex aan taako iyo bar ka badnayn; dhudhumadeeda, shanshadeeda iyo bawdyheeduba waxa ay ka marqaati kacayaan in Jane barwaaqo ku kortay; bawdyadeeda, miskaheeda iyo dibkeedaba geenyo faras laga ma sooco; labadeeda horaad ee aad mooddid in dalab khaas ah lagu farsameeyay iyo xabadka ay ku fadhiyaanba wax loo dhigo ma leh; gacmaha garaaraha leh ayaa ayaguna cajib leh; wejigeeda, sanqaroorka, indhaha waawayn ee buluugga ah iyo sunniyaha cajibta leh ee ku fooraraba waa afkalaqaad; labadeeda dibnood ee aad u malaynaysid in ay dhukasho kula maaggan yihiin iyo qosolkeeda qalbi-qabadka ahiba waa abuur Eebbe oo la la anfariiro. Sidaa oo kale, Jane waa inan aad u furfuran oo kaftan iyo sheeko badan.

Marar badan oo aan Jake iyo Jane u tagey aniga oo qaad raadinaya ayaan ogaaday in aysan abuur iyo dabci ahaan oo keliya ku kala duwanayn balse sidaa oo kale ay aqoon ahaan iyo hiwaayad ahaanba ku kala duwan yihiin. Jake inkasta oo uu aqoon ahaan ilaa heer jaamacadeed yahay haddana aqoontiisu ma dhaafsan inta uu ku xammaasho ma na aha nin wax akhriya. Waxa uu daneeyaa oo waqtiga isku dhaafiyaa kuna madadaashaa daawashada kubbadda cagta, filimaanta iyo riwaayadaha maadda ah. Halka dhanka kale, Jane, inkasta oo ay dhaqaalaha baratay maareeye na ka tahay laan ka mid ah bangi ka mid ah kuwa ugu waawayn dalka, haddana waa aqoonyahanad akhris badan oo aqoon durugsan u leh laamo aqooneed tiro badan gaar ahaan suugaanta sheekafaneedda, falsafadda, taariikhda, siyaasadda, juquraafiga iyo, taariikhda iyo falsafadda

diimaha. Dhawr goor oo aniga iyo Jane ka doodnay suugaanta iyo falsafadda ayaan la yaabay aqoonta ay majaalladaas aqooneed u leedahay. Waxa aan is iri malaha maba jiro buug aqoonahaa laga qoray oo Jane aysan akhrin.

Galab aan guriga Jake iyo Jane qaad u soo doontay baa Jane iga codsatay in aan xoogaa la fadhiisto si aan suugaanta sheekafaneedda uga doodno. Qolka fadhiga oo Jake telefishanka riwaayad madadaalo ah ka daawanayo ayay inta dhulka ii gogoshay darmuus shaah bigays kan qayilaadda ah ii keentay dabadeedna aniga iyo Jake ayay dhexdeenna fadhiisatay. Dabadeedna waxa ay i waydiisay haddii aan akhriyay buugga *Madame Bovary* iyo haddii kale. Waxa aan u sheegay in buuggaasi yahay kan aan ugu jecel ahay sheekafaneedda Faransiiska oo dhan. Inkasta oo Jane igu raacday xiisaha iyo farshaxannimada *Madame Bovary* haddana waxa ay ii sheegtay sheekafaneedda Faransiiska in ay ugu jeceshahay Marcel Proust iyo sheekafaneeddiisa *In Search of Lost Time*. Laakiin waxa aan u sheegay in aanan sheekadaas dhererka badan weli akhrin. Intaa ka dib, aniga iyo Jane waxa aan falanqaynay *Madame Bovary* gaar ahaan Emma Bovary iyo odaygeedi Charles Bovary. Jane waxa ay Emma ku tilmaantay inan nasiibdarrayd oo guursatay nin aan geyin oo aan ku dabeecad iyo ku hiwaayad ahayn, xataa aan ku aqoon ahayn, ayada oo iswaydiisay haddii Emma qarnigan noolaan lahayd in ay Charles guursan lahayd iyo kale. Marka Jane sidaa u hadlayso saaxiibkeed Jake halkan buu *ihii ihiiida* hayaa asaga oo moobeelkiisa ka fiirsanaya muuqaal shactaro ah asaga oo aan dhaadayn ama malahayga fahmaynba waxa Jane iyo anigu ka hadlaynno.

Dabadeed, Jane waxa ay si la yaab leh isugu xirtay isbarbardhigna ugu samaysay *Madame Bovary* iyo Sheekafaneedda kale ee Faransiiska ah, *The Necklace*, iyo *Anna Karenina*. Jane waxa ay ii sheegtay in Tolstoy markii uu *Anna Karenina* qorayay uu ka qalindaartay Gustave Flaubert iyo sheekadiisa *Madame Bovary* taa oo aanan runtii horay u ogayn.

Ugu dambayn, goor cawaysin ah ayaan aniga oo su'aalo badan iswaydiinayay Jane iyo saaxiibkeed Jake macsalaameeyay. Waxa aan iswaydiinayay isu ekaanshaha Emma iyo Charles Bovary, iyo Jane iyo Jake, iyo sababta Jane ku dooratay furista iyo ka doodista sheekada reer Bovary.

5

Qiyaastii afar bilood markii aan bishiiba labo jeer qaadka ka guranayay guriga Jake iyo Jane ayaan galab sidii caadada ahayd aniga oo qaad doon ah saaxiibbay u tagay dabadeedna aniga iyo Jake oo qaadkii gurayna ayaa Jane oo buug la ordaysaa inta xabadkeeda garabka midig iga saartay ayada oo horaaddada igu cadaadinaysa inta ay buuggii jaldigiisa i tustay igu tiri “ma akhrisay?” Buuggu waa *Fathers and Sons* uu Ivan Turgenev qoray. Aniga oo yaxxax dareemaya ayaan ku iri “haa, waan akhriyay.” Jane oo weli shafkeedi i cadaadinayo ayaa igu tiri “ma la yaabtay sida naagtii mucjisada ahayd u waashay Pavel Barzanov oo u burburisay mustaqbalkii wiilkaa badraanka ahaa?” “Haa, ma naxdo inkaar qabta ah ayay ahayd,” inta aan iri ayaan u dhaqaaqay laantii aan qaadka ka gurayay ma ahane mid kale oo xoogaa iga durugsan aniga oo ujeeddadaydu ahayd in

aan ka fakado hubka dhabarka iiga ligligan. Midda taa ka sii daran baa ahayd, marka Jane waxaa ku dhiiqsanayso in ay dhar ka xirnayd kastuumo ku giigsan oo bawdyaha bartankooda joogta, rajabeeto (kayshali) aan horaaddada wada daboolin iyo bajaamo aan badhanno iyo jiinyeer xirma midkoodna lahayn. Jake oo si wacan u arkayay waxa dhacayay oo dhan waxa ooga-hadalkiisa aan ka dareemay caro iyo xanaaq, inkasta oo uusan juuq dhihin.

Aniga oo ka welwelsan waxii Jane ku dhiiqsatay iyo dhiirranaanteed iyo ooga-hadalkii dhiillada lahaa ee Jake ayaan gurigii Muna oo bilooyinkan saldhig ii ahaa ii na beddalay maqaaxidii marfashka ahayd abbaaray. Runtii tan iyo maalintii aan Muna isbarannay waan ka raystay maqaaxidii marfashka ahayd, aniga keliyihi kama raysan ee dharkaygi ayaa ka raystay urtii iyo qurmoonkii sigaarka iyo qiiqa shiishadda ee tirabadnaa. Yeelkeede, in aan guriga Muna saldhigto hawl fudud ma ahayn. Halgan adag baan arrintaa u galay waayo Muna qayilaaddayda way ka didday dood dheer oo ay rabtay in ay iga ga goyso ayayna i la gashay.

Maalintii aan isbarannay maalintii ku xigtay baan Muna guriga ugu tagay. Muna keligeed bay guri degganayd taa oo ahayd arrin naadir in gabadh gashaanti Soomaali ah keligeed nooshahay. Waxa ay ii sheegtay in qoyskeedu Melbourne deggan yihiin ayaduna ay Perth afar gu u joogtay waxbarasho oo jaamacad Perth ku taallaa siisay mashruuca ay Ph.D-da ka diyaarinayso ayna ka shaqayso isbitaal gaar loo leeyahay. Muna qiyaastii waa soddon jir midabkeedu yahay maarriinkii Soomaalida lagu yaqaannay. Qurux ahaan dumarka Soomaalida ugu ma qurxoonaa ugu ma na foolxuma. Joog ahaan waa dhexdhexaad dhuuban. Laakiin waxa ay leedahay fool iyo dibno sidii magnadka ku soo dhifsanaya. Waa farxaanad kaftan badan oo aad u furfuran. Maalintii koowaadba waxa ay u ekayd sidii aan gu'yaal badan isnaqaannay. Ha se ahaatee, Muna marka ay kula hadlayo waxa ay u hadashaa si deggan oo qodobbaysan oo mar walba abbaarayso dulucda iyo ujeeddada. Kuma meeraysato daafaha halka ay u socoto ee gunta ayay beegsataa. Marka ay su'aal ku waydiinayso ayada oo labadeeda indhood kugu foogan yihiin bay ku waydiinaysaa inta aad jawaabtaada dhammaynaysidna kaa ma libiqsanayso, taa oo mararka qaarkood khalkhal kugu abuuraysa. Isla galabtii koowaadba Muna sidii ay shaqo i siinayso ayay waraysi iiga qaadday. Waxa ay i warsatay shaqada baska iyo jaamacadda halka maalin ah ma ahane waxa kale ee aan qabto aniguna si fudud baan ugu sheegay “habeennada Jimcada iyo Sabti waan qayilaa Axaddana waan nastaa.” Sidii qof war ka nixiyay loo sheegay bay inta feejignaan gashay oo wejiga uruurisay igu tiri “ma adiga oo ninkaa wayn ah oo weliba waxbarta ayaad qaad cuntaa?”

“Oo waayo? Haddaan nin wayni qayili lahayn ma caruurtaa qayili lahayd?” baan ku iri. “Qayilaaddaba in wax lagu barto ayaa loogu talagalay,” baan u sii raaciyay.

“Qof sharaf lihi in uu qaad cuno ma rumaysni,” Muna ayaa tiri.

“Waa dacaayad si khaldan loo fidiyay, kuwo qaadka balwad ay qabatimeen ka dhigtay baana sabab u ah,” anigaa isku difaacay.

“Balwad ka dhigtay” maxaad u la jeeddaa, sow qaadkuba balwad ma aha?” ayay igu halgaadday.

“Balwad ma aha laakiin haddii laga dhigo waa uu noqonayaa sida bunka iyo khudaartuba balwad la qabatimo u noqon karaan,” anigaa ku dhahay.

“Bunka gartay ee sidee khudaartu balwad ku noqotaa?” Ayay i waydiisay.

“Khudaar ma cuntaa?” ayaan waydiiyay. Markaa ayay igu tiri “haa, weliba hilib ma cuno oo *vegetarian* baan ahay. Intaa markii ay afkeeda ka soo baxday baa nabar igu taagnaa iga fuqay Muna na god aan la goobayay iigu dhacday.

“Haddaba adiga qudhaadu waad qayishaa ee qiro. Ogowna in qaadka laftiisu khudaar yahay oo uusan kabajka iyo kabsarta waxba uga duwanayn,” baan ku dhahay.

Inta ay qososhay bay tiri “abboowe isdifaaca jooji. Wallaahi qayilaaddu waa balwad xun ee iska dhaaf,” bay cod naxariis leh igu tiri. “Anyway qof qayila wejigii ma lihid,” ayay sii dabadhigtay.

“Abbaayo mahadsanid, laakiin qaadka balwad ahaan u cuno ee wax baan ku akhristaa waxna waa ku qoraa, saacado kooban, haddii aanan qayilaynna wax nah leh ma qori karo oo xataa essay-yada jaamacadda kuwii aan qoray aniga oo aan qayilsanayn qaar waa ku dhacay qaar kale na waan ku dhici gaaray, halka kuwii aan marqaanka ku qorayna aan buundooyin sare ku helay,” intaa ku dhahay baan moobeelkayga ka tusay dhawr *essay* oo aan qoray. Waxa aan tusay labo qormo oo xusuus gooni ah igu reebay kuwaa oo inkasta oo ay aniga iyo macallintaydi khilaaf naga dhex abuureen haddana ugu dambayn aan dhibco sare ku helay. Labada qormo oo cinwaankooda macallimiintu ii dooreen waxa ay ahaayeen: *The Age of Discovery* iyo *The Age of Exploration* laakiin anigu cinwaannadaa waxa aan u arkay marinhabaabin taariikheed, sidaa aawadeed baan mid walba u beddalay *The Age of Destruction* iyo *The Age of Exploitation*. Muna aad bay u la dhacday sida aan uga gilgishay marinhabaabinta sooyaalka, waxa aanan jirkeeda ka dareemay in uu xoogaa dabacay oo didmadii uu qaadka ka didsanay joojiyay, ugu yaraan qayilyaadda wax lagu qoro waxna lagu akhriyo.

Intaa dabadeed waxa aan tusay dhawr *essay* oo kale, iyo sheekooyin gaagaaban oo aan fadhi marqaan ku allifayna waana aan u diray.

Dhawr toddobaad ka dib Muna waxa ay iga oggolaatay in ay habeenka Sabtida gurigeeda ii gogosho oo aan halkaa dhawr saacaadood ku marqaamo, ayaamo kale dabadoodna markii ay ogaatay in aan shiishadda cabbo oo maqaaxidii u dhuunto ama marka aan ayada ka hoydo sii maro ayay igu tiri “shiishadana halkan isaga cab intii aad maqaaxi *public* ah adiga oo nin wayn shiishad ku nuugi lahayd. Maalintaa ayaan ka raystay maqaaxidii iyo marfashkii “nin waalan” la iiga yaqiin.

Xiriirka aniga iyo Muna markii hore saaxiibnimo ayuu ku koobnaa laakiin ayaamo dambe ayuu xiriir jacayl u xuubiibatay. Dhab ahaan anigu Muna aragtii koowaadba waan ka helay balse inkasta oo ay si sahlan oo gobonnimo leh ii soo dhowaysay ii la na jaanqaadday, haddana markii aan ogaaday in ay tahay gabadh urursan oo xiriir dhab ah un danaynaysa ayaan candhuuftayda dib u laqay oo Muna u la dhaqmay sidii ay rabtay. Yeelkeede, Muna iyo anigu maalinba maalinta ka dambaysa waan isku soo dhowaanaynnay oo isku soo durkaynnay oo isku soo sikanaynnay ilaa aan is aragnay annaga oo illintu naga dareerayso oo isku leh “gacaliso waan ku jecel ahay, iyo gacaliye anigaa kaa daran.”

Dhab ahaantii, Muna quruxdeeda iyo dabeecaddeeda oo keliya kuma aanan jeclaan ee weligeyba waxa aan raadin jiray oo ku hammin jiray in aan nolol la wadaago gabadh iga aqoon badan, mas'uul ah wacyi ahaanna aad u korran; Muna na intaaba waa ay kulansatay.

Xiriirkii jacayl ee aniga iyo Muna waxa uu galaftay qaar ka mid ah saacadihii aan qayili jiray iyo wax akhriiskii iyo wax qoristii wehliisay, gaar ahaan habeenkii Jimcada, waayo, suuragal ma ahayn in gacalisayda oo i dhinac fadhida aan qaad ruugis iyo buug akhris ku foognaado. Sidaa daraaddeed, halkii aan qaad ka ruugi lahaa Muna ayaan magaalka la galaa, mar aan shaleemo galno, mar aan tiyaararka aadno iyo mar aan maqaaxi ka cashaynayno ayaan habeenka Jimcada ku dhammaynaa. Sabtida un qayilaaddii akhriiskaygi ku soo uruureen, iyo Axadda oo aan dhawr baal akhriyo. Muna inkasta ay shaqanaysay waxna baranaysay haddana xiriirkeenna si dhab ah bay daacad uga ahayd mar walba oo aynnaan shaqaynayn ama waxbarasho ku jirinna waxa ay jecalayd in aan wadajoogno oo waqti isla qaadanno, mar walbana waxa ay jeclahayd in *attention* la siiyo, ilaa ugu dambayn aan fadhigii Sabtida iyo nasashadii Axadda ka tanaasulay oo aan ag fadhiga Muna ku soo ururay.

Waxaa intaa dheeraa oo qayilaaddaydi yareeray ayaa ahaa geedkii aan qaadka ka soo guran jiray oo ninkii lahaa, Jake uu xiddada u rujiyay ka dib markii uu hinnaasay. Galabtii Jane horaaddada igu cacamisay waxii ka dambeeyayba Jake dabeecad sirgaxan buu la soo baxay. Labo toddobaad ka dib galabtii Jane sakaarka igu hiigtay baan Jake wacay u na sheegay in aan u imaanayo balse waxa uu ii sheegay in uusan weli Perth imaan oo shaqada uu toddobaad dheeri ah ku maqnaan doono, aniguna haye ayaan ku iri, inkasta oo qaab-hadalkiisa iyo sida uu weedhaha u soo gaagaabinayay shaki igu abuureen. Dabadeedna cabbaar ka dib baa nambaar aanan garanayn i soo wacay. Waaba Jane oo hadal iiga bilowday “Jake ma isla hadasheen?”

“Haa, ee maxaa jira?” ayaan ku iri.

“Maxuu kugu yiri?” Jane baa tiri.

“Toddobaad dheeri ah baan shaqaynayaa oo maanta ma aanan imaan buu igu yiri,” anigaa iri.

“Been buu kuu sheegay,” bay tiri.

“Oo sababtee ayuu iigu sheegay?”

“Anigaa wax walba kuu sheegaya ee halkee baad joogtaa?”

Maqaaxi ka soo horjeedka gurigayga ku taallay baan u sheegay in aan joogo, dabadeedna waxa ay tiri “igu sug waan kuu soo socdaaye.”

Labaatan daqiiqadood ka dib bay Jane ii timid dabadeedna waxa ay ii sheegtay war aan ka naxay, kaa oo ah in geedkii qaadka ahaa Jake saaka salka ka rujiyay. “Oo sabab?” Baan waydiiyay.

“Waa uu hinnaasay. Tan iyo galabkii isugu keen dambaysayba afka ayuu tuurayay saaka markii uu yimid asaga oo aan dharkii shaqada iska beddalin buu inta gudinta qaatay geedkii gooyay, markii aan waydiiyay waxa khaldanna waxa uu igu yiri “waad i khiyaamaysaa oo nin kale ayaad igu feer waddaa,” ayay tiri. “Waan ka xumahay Jaamac geedkaagi waa la gooyay, haddana labo

bacood oo laamihii uu gooyay aan ka soo guray baan kuu wadaa oo gaariga ayay saaran yihiin,” bay sii raacisay.

“Dabadeed maxaa dhacay?” Baan waydiiyay.

“Aniga iyo Jake waan isdagaalnay dabadeedna gurigii ayaan ka eryay oo boorsooyinkiisi ayuu gurtay,” bay igu tiri. “Bas waaye aniga iyo Jake waa inoo kala dhammaatay awalba khadyaan baan ka taagnaa,” ayay sii dabadhigtay.

“Jane maxaad samaysay? Maxaad ninkaaga sidaa ugu gashay?” Baan waydiiyay.

“Maxaad ka hadlaysaa? Ma ahan ninkayga ismana qabno,” ayay tiri.

“Oo guriga sow asagu ma laha?” anigaa waydiiyay.

“Waan isla iibsannay haddana waan iibinaynaa,” ayay tiri.

“Waxa aan moodayay in aad isguursanaysaan?” anigaa dhahay.

“Waxaasi waa taariikh laga gudbay. Ilaahow mahadsanid in aanan axadkaas guursan,” Jane baa dhahday.

“Jane waan ka xumahay in xiriirkii adiga saaxiibkaa dartay u burburay,” anigaa dhahay.

“Maya, maya, Jaamac, adiga dartaa u ma burburin,” bay tiri.

“Sidee ayuusan dartay ugu burburin? Ninka uu kaaga shakiyay sow aniga ma aha?” ayaan waydiiyay.

“Aniga iyo adiga maxaa na dhexmaray oo uu ka hinnaasay?”

“Waxba laakiin waa aniga ninka uu ka hinnaasay sow ma aha?”

“Haa waa adiga laakiin sidee ayuu iga hinnaasay qof aan waxba naga dhexayn?”

“Maxaad ugu sheegi wayday sidaa? In aniga iyo adiga aysan waxba naga dhaxayn?”

“Haddii aan u sheego oo uu qanco berrina maxaan u sheegi doonaa oo ku qancin doonaa? Ninka asaga oo aan i qabin sidaa u hinnaasaya maxuu samayn doonaa marka aan is guursanno?” Aad baan u nasiib badan ahay,” bay sii dabadhigtay.

“Waan ka xumahay waxa kugu dhacay Jane,” ayaan iri.

“Wax aad ka xumaatid igu ma dhicin adiguna gef ma aadan falin,” bay iigu jawaabtay.

Dhawr saacadood baan aniga iyo Jane maqaaxidii fadhinnay oo marna anigu raalli gelinayay mar ayaduna geedkii la iga jaray iga raalligelinaysay. Dabadeed, markii aan ismacsalaamayn rabno ayay i waydiisay in aan xaas ama saaxiib leeyahay, aniguna u sheegay in aanan xaas lahayn balse aan Muna dhowaan isbarannay. Dabadeedna, “ma isguursanaysaan?” ayay i waydiisay. Markaa ayaan u sheegay in aynnaan weli taa go’aansan. Intaa ka dib aniga iyo Jane waan kala hoyannay.

Muna iyo anigu sidii aan horay u sheegay waxa aynnu noqonnay lammaane aad isu jecel oo har iyo habeen isku lammaan oo qofkii arkaa u malaynayo lammaane isqaba ama isu doonan laakiin haddana annaga oo sidaa isu ah weligeen arrin guur kama aynnaan wada hadal sababtuna waxa ay ahayd Muna oo aniga iga sugaysay in aan qodobkaa furo, aniguna, inkasta oo Muna aan jeclaa goor horena go'aansaday in aan nolol la wadaago haddana mar walba oo aan u hollado in aan guur u bandhigo wax baa ii diidayay oo iga horistaagayay. Mar walba oo aan damco in aan Muna guur u bandhigo cabsi i khalkhalisa ayaa igu kedinaysay. Mar walba oo xiriirka aniga iyo Muna toddoobaad u dhammaado baqdin iyo welwel baa igu sii siyaadayay. Mar walba oo bil cusubi xiriirkeenna u dhalato khalkhal iyo degganaan la'aan baa i dabooli jiray. Waxaa kale ee welwel iyo baqdinta igu abuuray dabciga Muna ee jecel danaynta iyo kawarqabka joogta ah marka aanan shaqaynayn ama waxbarasho jirin, iyo la hadalka saacad walba ah, xataa saqbarka habeenkii, kaa oo meesha ka saaray saacadihii aan wax akhrisan lahaa. Muna waxa ay jeclayd in ay ogaato maalin walba waxa aan qabanayo iyo halka aan joogo, iyo xataa waxa aan cunayo. Haddii ay i soo wacdo oo aan taleefanka qaban waayo waxa aan fishaa canaan ama dagaal saacado socda.

Waxa aan oddorasay aniga iyo Muna oo isguursannay oo ubad inoo dhashay iyo aniga oo noloshaydu ku soo uruurtay shaqo iyo daryeelka ubadka iyo Muna. Waxaa ii muuqday aniga mashquul qoys iyo mid shaqo la daalaadhacaya oo aan bilooyin ama sannado badan waxba akhrin dabadeedna sidaa ku gaboobay ugu dambaynna aakhiro u galbaday ka gadaalna gacalisadaydi Muna, carruurtaaydi, xubnaha qoyskaygi iyo saaxiibbay ay ayaamo geeridayda ka tiiraanyoodeen dabadeedna iska kay illoobeen. Waxa aan iswaydiiyay haddii noloshaydu jidkaa marto waxa aan ka dheefayo ama ka dheefay nolosha adduunyada.

Habeenno badan ayaan guurka Muna ka fekeray aniga oo sariirta jeegojeego u bilqan oo saqafka qolka aan jiifo ku dhaygagsan dabadeedna hummaaggaas aan iga farxini i hor yimid. Habeenno badan baa aniga oo sidaa saqafka ugu foogan oo u ilgalaclaynaya sidii maxbuus dagaal waagu ii dillaacay. Runtii waxa aan la mid ahaa qof u dhexeeya dhagax iyo meel adag, ama nin labo dhagax dhexdood ku go'doomay. Waxa aan aaminay haddii aan Muna isguursanno in aan ka tanaasulayo riyadaydi akhriska iyo qoraalka, ama dhanka kale, aan guurka Muna ka tanaasulo dabadeedna aan riyadayda raadguro. Waxa aan rumaystay in labadan qodobi aysan isla jaanqaadi karin oo aanan labadooba isku feer wadi karin. Runtii kuma aanan dhiirran karin kala doorashada labadaa qodob. Waan ku dhici waayay in aan mid tuuro oo kan kale qaato. Sidaa daraaddeed, waxa aan noqday nin jaahwareersan oo aan garanayn meel uu u socdo iyo meel uu ka socdo toona. Waxa aan noqday ruux maahsan. Ruux lugaynaya oo aan garanayn halka uu u socdo. Waxa aan dareemay faaruqnimo gudeed, qiimo la'aan iyo marnaan, waxaana iga lumay ujeeddadii nolosha oo dhan.

Haddii horay aan ugu busayli jiray la kulanka iyo la joogga Muna hadda wicitaankeeda ayaan argagax ka qaadaa mar kasta oo aan la kulmayana waxa aan u tagaa aniga oo wadnuhu i fugfug leeyahay oo is leh “tolow maanta ma waxa ay ku oran doontaa: Jaamacow xiriirkeennu waa dabadheeraday ee maad inoo talisid oo reerka iga doontid.” Maalin walba waxa aan ka ducaysan jiray in Muna arrin guur igu soo qaaddo. Ha se ahaatee, inkasta oo aan waxaa oo jaahwareer ah dhexjibaaxayay haddana waxa aan ku dedaalay oo ku guulaystay in Muna aysan wax isbeddal ah iga dareemin. Mar walba oo aan Muna la joogo waxa aan iska dhigi jiray in aan caadi ahay. Waxa aan muujin jiray dareen been ah oo ka duwan kan uurka iyo maankayga ka qaxmaya. Qosol aan laabta jirin baan ka dhagdhagsiin jiray. Qof aanan ahayn baan iska dhigi jiray. Yeelkeede, ugu dambayn Muna waa dareentay isbeddalka igu dhacay waa na ay akhrisay dareenka gudahayga ka shidan ee aan ayaamaha badan ka qarinayay. Waa tii Soomaalidu horay u tiri *socod aadan u dhalan saddex tallaabo ma dhaafo*’e Muna ugu dambayn waxa ay jillaafu u dhigtay majahaygi dhuudhuubnaa ee tallaabada bugta ah tallaabsanayay.

Ugu horrayn, Muna waxa ay bilowday in ay hadallo duurxul ah igu tuurtuurto, sida: labadeenna midkee ayaa kulka jacaylku ku badan yahay? Jacaylkeennu waa meeqa jir? Iyo hadallo la mid ah kuwaa oo mid waliba sidii tareesadii laabtayda uga dusayay. Ugu dambayn, habeen Talaado ah aniga oo shaqada dhammeeyay bay Muna i soo wacday oo igu amartay in aan guriga ugu imaado. Caadiyan sida badan habeennada shaqada aniga iyo Muna ma aynnaan kulmi jirin, keliya taleefanka ayaan ka wadhadli jiray. Aniga oo wadnuhu i fugfug leeyahay, sidii caadada ii ahayd, baan Muna u tagey. Dabadeedna ayada oo aan araar dheer waqti isaga lumin bay i taabsiisay farriintii ay iigu yeeray. Waxa ay tiri “gacaliye Jaamacow sidaa og tahay muddo dheer baynnu xiriir jacayl daadihinaynay sababta aan muddadaa dheer haasaawaha jacayl u jilinaynayna waxa ay ahayd in aan guri yagleelno oo nolol wadaagnno. Miyaad taa igu diiddan tahay?”

“Maya, kugu ma diiddani,” ayaan ugu jawaabay aniga oo ka baqaya in ay maqasho garaaca wadnahayga sidaa oo kalena ka cabsi qaba in dhidid kulul iga soo yaaco.

“Haddee gacaliyow sow lama gaarin goortii aynnu hammigeenna ka dhabayn lahayn oo aad reerka iga dooni lahayd?” Muna ayaa tiri.

Aniga oo carrabkii i angegey hadalkuna i dhibayo ayaan iri “gacaliso waa runtaa waa la gaaray, laakiin... laakiin... een... een... laakiin...”

“Balse gacaliye waa maxay laakiinta badani? Miyaadan diyaar ahayn?” bay dhahday.

“Gacaliso diyaar waan ahay laakiin.. een... een.. laakiin....”

“Jaamac kuma fahmin, maxaad u la jeeddaa laakiin?”

“Gacaliso... een... een... anigaa kaa jecel in aan nolol wadaagno laakiin... een... een... laakiin...”

Muna oo dareenkeedi isbeddalay xanaaq iyo niyadjab isku lammaanna dhafoorkeeda laga dheehan karo ayaa inta istaagtay tiri “Jaamac een eentan iyo laakiintan tirada badan inta iga joojisid si fiican ii dhagayso, all that I need from you is YES or NO, end of story. Reerka ma iga doonaysaa haa ama maya?”

Aniga oo dareemay in caawo la i hayo cabsidii iyo wadnagaraaciina xoogaa iga yaraadeen baan si deggan ugu iri “gacaliso isdeji. Waxa aan ka hadlaynnaa waa guur. Ma aha wax sahlan, waa wax ka feker iyo ka fiirsasho u baahan.”

Muna oo foolkeeda caradii iyo niyadjabkii ku sii siyaadeen baa tiri “Jaamac maxaa tiri? Ka fiirsasho! Ma hadda ka dib baad guurkeenna ka fiirsanaysaa? Guurkaaga diyaar u ma ahi maad iska dhahdid oo runta ii sheegtid.” “Haye, haye, waayahay, ka soo fiirso oo ka soo feker. Haddii aad doontid toban sano ka soo feker ee guriga ii dhaaf waan seexanayaaye,” ayay sii dabadhigtay.

“Macaanto ha i khalad fahmin. Waan ku jeclahay ee gacaliso khalad ha iga fahmin,” baan ku iri.

Laakiin inta aanan hadalkii dhammayn bay inta iriddii furtay illinka ii farmuuqday oo si qaylo ah iigu tiri “iga bax iga bax waan seexanayaaye.” Inta aan soo dhaqaaqay baan damcay in aan laabta geliyo oo dejiyo balse inta ay kulleetiga i jiidday bay iridda halhaleel igu dhaafisay dabadeedna albaabkii hoos ka xiratay.

Iriddii ayaan garaacay aniga oo ka tuugaya in mar un ay iga furto yeelkeede ii ma ay juuqin.

Qiyaastii saacad ayaan marna iriddii tumayay marna moobeelkeedi wacayay ilaa ay moobeelkiiba dansatay. Dabadeedna aniga oo niyadjabsan oo dareemaya in aad gef wayn ku kacay baan hoyaaday. Waxaa ii muuqday Muna sariirta ku dul barooranaysa oo illintu ka hibiq leedahay markaa ayaa anigana qalbigu i dillaacay oo calooshu i hurtay. Wax walba waan u adkaysan karaa laakiin ma eegi karo oo u ma dulqaadan karo Muna oo barooranaysa. Habeenkii oo dhan hurdo ma ladin, waxa aan ka fekerayay xaalka Muna ku sugan tahay. Labaatameeyo goor mindhaa waan wacay telkeeda oo dansan. Xataa dhawr goor baan damcay in aan gurigeeda ku noqdo bal in ay iridda iga furto.

Aroortii ayaan shaqadii wacay oo u sheegay in aanan maanta, berri iyo saadambe shaqada imaan doonin, taa oo macneheedu yahay shan maalmood oo fasax ah maadaama Jimcadu tahay fasax guud (public holiday). Dabadeed, qabow daran oo dhacayay awgii ayaan inta labo kubbeerto huwaday sariirta isku kala bixiyay aniga oo shaxaadaya hurdo ay mashaqada i haysaahi tan iyo xalay bannaanka ku horaysay.

Dhawr saacadood ka dib markii aan soo toosay baan moobeelka eegay mise waxaa shaashadda saaran farriin Muna ka timid. Si halhaleel ah ayaan u furay mise waa lix eray oo qur ah u na dhigan sidan: “don’t call me again, ever! Nacas.”

Mar qur ah ayaan niyadjab iyo xanaaq wada dareemay, dabadeedna waxa aan u qoray: “waan ku jecel ahay gacaliso wax walba oo dhaca.” Haddana daqiiqado ka dib baan u qoray: “waan kuu

imaanayaa si aan arrinta uga wadahalno.” Ku dhowaad labo saacadood markii aan moobeelka gacanta ku hayay aniga oo jawaabta Muna dhawraya ayay ii soo qoray: “boliiska ayaan wacayaa haddii aad agagaarka gurigayga soo istaagtid.” Waxa aan goostay in aanan u jawaabin.

Inkasta oo aan doonayay in aan Muna dejiyo oo xiriirkeenna badbaadiyo haddana xaqiiqdii su’aasha Muna ee guurka jawaab u ma aanan hayn oo haa iyo maya midna ku ma dhaheen. Yeelkeede, farriinta dambe ee Muna ii soo dirtay waxa ay ruux cusub ku afuufay doonistaydi igu riixaysay u go’idda akhriska iyo qorista, waxa ayna shiiqisay oo khalkhal ku ridday guursiga iyo nolol la wadaagidda xaawaley oo dhan.

Farriinta dambe ee Muna waxa ay i xusuusisay nolosha oday Soomaali ah oo marfashka qayilaadda iyo shiishadda kalyanti ka ahaa. Waa oday qiyaastii da’ toddobaatanaad ah, dherer ahaan marka Soomaalida la eego dadka dhaadheer baa lagu tiriyaa. Waxa uu leeyahay timo badan oo foodshareer leh oo wada cirroobey, shaarib dheer oo asma cirraystay baa u raaca. Aad u ma cayilna balse calool wayn buu leeyahay. Waxaa la sheegaa in odaygu dalka yimid bartamihii siddeetanaadkii ilaa waagaasna uusan maalin qur ah ka bixin. Waxa kale oo la sheegaa in uu ku dhowaad soddon gu’ baswade ahaa laakiin hadda waa darawal tagasi oo Sabtida iyo Axadda un shaqeeya halka shanta maalin ee kale uu qaad ruugis iyo ciyaarista turubka u fadhiyo. Sabtida iyo Axadda xataa gelinka hore un buu shaqeeyaa gelinka dambena marfashka ayuu iska xaadiriya. Waxaa la xaqiijiyay in odaygaasi dhawrkii biloodba habeen ama labo habeen uu baabuurkiisa dhex seexo sababtuna waa naagta uu qabo oo bacdiisa bannaanka ugu tuurta. Waxaa la qiray in tan iyo sagaashanaadkii ay nolosha ninkani sidaa ahayd. Waxii intaa ka horreeyay cidina ma sheegi karto maadaama Soomaali aan asaga ahayni aysan dalkan joogin. Waxaa la arki jiray duqaas oo labo beri baabuurku hoy u yahay haddana maalinta xigta waxaa suuqyada lagu dhex arki jiray asaga iyo islaanta uu qabo oo gacmaha is haysta suuqana dhexlaafyoonaya.

Eraga “boliiska” ee farriinta Muna ku jiray baa sheekada odaygaa i xusuusiyay.

7

Xusuusta sheekada odaygaasi waxa ay ii sawirtay hummaag iga nixiyay oo timaaddadu ii rimman tahay haddii aniga iyo Muna nolol wadaagno. Waxaa hummaaggaasi i daawadsiiyay isu ekaanshaha Muna iyo xaaska odaygaa. Runtii u ma aanan bogin isbarbardhiggaas ma na jeclaysan in hummaagsigaygu sidaa u fekeru oo xumaan iyo balaayo oddorose noqdo, haddana qayb iga mid ah ayaa rumaysatay oddoroska hummaagsigayga oo igu oronaysay ‘sax, waa runtaa. Ma naagta ayada oo weli aan la mehrin boliiska u yeeraysa ayaa wanaag ka soo socdaa?’

Muddo saacado ah ayaan sariirtii bilqanaa aniga oo labadayda qaybood ee qaybi Muna ceebaynayso qaybta kalena ceebkasaliim ka dhigayso u garnaqaya, laakiin aniga oo aan weli heshiis dhexdhigin ayaan markii aan ku daalay inta sariirtii ka dul kacay qado karis isku

mashquuliyay markii aan qadeeyayna inta aan miiska akhriska fadhiistay ayaan soo qabsaday *Anna Karenina* oo bilo ka hor aan soo gatay balse aanan akhrin. Inta aanan baalashiisa kala furin baan inta labada gacmood ku qabtay hadba dhan ka eegay aniga oo la amakaagsan tirada baalashiisa. Ma aha markii ugu horraysay ee aan akhriyo. Hadda ka hor baan aniga oo safar ah akhriyay balse isla daqiiqaddii aan dhammeeyayba waxa aan go'aansaday in aan mar labaad akhriyo ha se yeeshee intii aan safarkaa ku jiray baan siiyay qof iiga dhagay. Aniga oo ka xun baan siiyay.

Cabbaar markii aan eegeegayay baan balaashiisa kala furay dabadeedna inta aan bogaggii hordhaca iyo araarta baalmaray baan cutubka koowaad dul tagey. Judhii horeba waxaa indhahaygu joojiyaha ku dulqabteen jumlada caanka ah ee Tolstoy buugga ku ibafuray: *Happy families are all alike; every unhappy family is unhappy in its own way*. Ka dib na inta aan qalin qabsaday baan warqad cad jumladada ku minguiyay balse halkii ahayd *families* iyo *family* baan ku beddalay *couples* iyo *couple*.

Tan iyo habeenkii saqdhe ayaan kursigii dul yuuraray oo *Anna Karenina* akhrinayay. Dabadeed sariirtii ayaan aniga oo hurdo aan i hayn shaxaadaa. Ma doonayn in aan moobeelka eego, ma doonayn in aan qof na la hadlayo, xataa Muna. Sidaa daraaddeed, markii hurdo iga soo dhici wayday baan buug kale soo qabsaday balse cabbaar ka dib waan ku caajisay, markaa ayaan inta moobeelkii soo qabsaday “*mute*” gariir la'aan ah saaray, dabadeedna baraha bulshada cabbaar dhexmushaaxay. Waan arkayaa farriimaha saaxiibbaday iyo ehelkaygu ii soo dirayaan balse ma rabo in aan furo. Ma rabo in aan farriimaha aakhriyo. Waxa keliya ee aan rabaa waa in aan keligay ahaato, in aan naftayda la keliyoobo un baan rabaa. Maxay iga rabaan dadkan farriimaha ii soo dirayaa? Maxay ii dhibayaan oo ii soo wacanayaan? Maxay ii lurayaan? May faraha iga qaadaan oo ammaanka iigu dedaalaan? Weligiinba i soo waca ama farriimo ii soo dira, mindhaa idiin ma jawaabo.

Qiyaastii afartii aroornimo mar saacaddu tahay baan inta *YouTube* galay waxa aan daartay maqalka buugga *The Red Book* ee Carl Jung uu qoray laakiin halkii aan buugga ka dhagaysan lahaa waxa aan galay feker maankayguna waxa uu ku mashquulay xusuusaha xikmadihii Carl Jung. Waxa aan xusuustay xikmaddiisi ahayd “*nolosha mudnaanteedu waa marka aad noqotid qofka aad dhab ahaan tahay/the privilege of a lifetime is to become who you truly are.*” Kumaan dhab ahaan ahay? Kumaan rabaa in aan noqdo dhab ahaan? Hayaanka noloshaydu halkee geeddi u yahay? Halkee la ii wadaa? Maxaan doonayaa? Hummaaggii gacalisadayda Muna ayaa i hor yimid markaa ayaa waydiinteedi igu soo dhacday: “goormaad reerka iga doonaysaa?” Haddana waxa aan xusuustay farriinteedi u dambaysay: “boliiska ayaan wacayaa.”

Maxaan doonayaa? Muxuu mustaqbalkaygu noqon doonaa? Ma sida toddobaatan jirkii habeennada qaarkood gaarigu hoyga u ahaa oo kale? Mase nin xor ah oo akhriska iyo qoraalka heer sare ka gaara oo qoraa wayn oo caan ah noqda? Aniga oo aan jawaab u helin baan haddana

xusuustay mar kale oo Jung leh “*nin aan cadaabta dareennadiisa arkini ma guulaysto/a man who has not passed through the inferno of his passions has never overcome them*”.

Labo beri iyo maanta oo ah Jimce sii galbanayo ayaanan qolkayga hurdada ka bixin, mar aan suuli aado mooyee. Hurdo, akhris, cunis iyo dhexmushaaxa baraha bulshada un baa camalkaygu ahaa. Wax kale oo Alle abuuray ma qaban, xataa hal qofna lama hadlin labadaa beri. Xataa farriimaha gaagaaban qof u ma dirin kuwa la ii soo dirayna kama jawaabin. Ka jawaabis iska daaye, xataa ma eegin. Gariirka moobeelkana waa tii aan iska xiray si aanan u maqlin soo dhicistiisa. Xataa lugabaxsigii aan maalin walba soddon daqiiqo lugayn jiray u ma dhaqaaqin.

Dhabarkaa i xanuunay sidaan barbar ugu aallay, indhahaa i xanafafay sidaan ugu foognaa buug iyo shaashadda moobeelka. Suulka midig ee gacanta ayaa i dikaamay sidaan shaashadda moobeelka ugu salaaxayay.

Maalintii saddexaad baa gebogebo ah aniga oo weli bartii barbar u aal sidii qof duumo hayso. Goorsheegtada ayaan eegay mise waa saddexdii galabnimo. Ku dhowaad toddobaatan saacadood baanan ka degin iridda qolkan dhawrka mitir ah. Maxaa iga si ah? Miyaan xanuunsan ahay? Sow tan Raskolnikov la i moodo? Xusuusta magaca ninkaasi waa iga nixisay. "Ma doonayo in aan Raskolnikov oo kale noqdo. Eebbe ayaan ka magangalay in aan tabtiisi oo kale noqdo," intaan uurka iska iri baan istaagay si aan biyo isugu sayriyo dabadeedna u qadeeyo.

Intii aan qubaysanayay iyo intii aan qadaynayayba waxaa igu soo noqnoqonayay xusuusta Raskolnikov iyo sidii fooshaxumayd ee uu Alyona Ivanovna iyo walaasheed ka yar , Lizaveta u dilay. Si gaar ah waxaa murugo iigu beeray geeridii Lizaveta. Maya, geerideeda oo keliyihi i ma murjin ee noloshi ay ku noolayd iyo arxandarradii walaasheed Alyona baa qalbigu i la balbalay, dabadeedna nolosha adduunyada oo dhan baan niyad ahaan u lacnaday. "Horta dunidaanay arxandaranidaa oo dugaagsanidaa oo qalbi adkidaa?" Intaan laabta iska iri ayaan indhaha la raacraacay buugaagta iskafaallada rasaysan aniga oo raba in aan ka xusho kan ugu baalasha yar. *Communist Manifesto* ayaa dookhaygu noqday, dabaadeedna intaan jeebka dambe ee jiiniska aan gashan ahay ku riixay baan iridda ka booday afkana saaray toobiyaha taga maqaaxidii bunka wacnayd.

Saddex beri ka hor markii bannaanka iigu dambaysay cimilada Perth ma ahayn mid naftu jeclaato. Waxaa jiray dhaxan daran, dabaylo iyo roob shuux ah. Balse galabta xaalku si walba waa uga duwan yahay sidii uu ahaa saddex beri ka hor. Dhirta cagaaran ee gacan-ku-rimiska ah ee hareeraha waddooyinku lagu beeray caleentooda waxaa ku raran raadka dhibcihi roobkii shuuxaha ahaa kuwaa oo fallaaraha qorraxda sii galbanaysaa ay bilicdooda sii bileen. Neecawda sida deggan ee naxariista leh bari uga soo dhabanaysa iyo ufada shuuxii dhawrka beri da'ayay nagu macsalaameeyayna waa kuwo naftu ku xasilayso. Laamiyada si wacan loo daryeelay galabta ma leh saxmaddii iyo buuqii lagu yaqiin; baabuur qurux badan baa si xabbad-keliyaale ah u xiimaysa. Aqallada laamiga ku teedsan ee mid walba dhawrka baabuur ku hor callaqaan yihiin waxa aad

mooddaa in laga hurdo sida ay shanqar la'aan u yihiin. Cirka sida calankii dalkayga khafiifka ah waxaa ka sokeeya oo meel dhexe heehaabaya daruuro teelteel ah.

Soddon daqiiqadood ka dib waxa aan gaaray maqaaxidii bunka wacnayd ee webiga Iswaan jalleecaysay. Inta aan koob dheer oo kobbashiino ah dalbaday baan fadhiistay miis labo kursi taallo kaa oo saaran qarka webiga Iswaan. Markii aan sii fadhiisanayay baan jeebka dambe ka maqlay *qajajac qujujuc*. Markaa ayaan niyadda iska iri “weligaaba qajajacee ama qujujucee, dhaaxaa sadarradaadu qowmiyado badan qajajac iyo qujujuc kaga siiyeen. Dhaaxaa farriimahaagu malaayiin iyo malaayiin shacab ah gumeeyeen! Dhaaxaad kummaan iyo kumannaan Saaybeeriya ku qalatay.

Laamigii aan soo maray iyo kobta aan fadhiyaaba waa kuwo indhaha iyo maankaba u roon.

Markii aan bunkii labo jeer kabbaday baan damcay in la soo baxo buugga aan ku fadhiyo ee qajajacda iyo qujujucda haya balse haddana si degdeg ah ayaan isu beddalay dabadeedna wargeys miis kale saarnaa ayaan soo qabsaday. Ha se yeeshee goortii aan u holladay akhrinta wargeyska ayaa xusuustii Raskolnikov igu soo maaxatay. Cabbaar baan bogga hore ee wargeyska indha la raacraacay, laakiin, runtii, indha un baan wargeyska ku eegayaye maankaygu waxa uu ku foofay ka fekerka Raskolnikov iyo sababtii uu Alyona iyo walaasheed Lizaveta u dilay. Dabadeed waxaa igu dhalatay fekrad cusub oo mar iga yaabisay marna iga qoslisay. Waxaa igu dhalatay fekrad aan kaga maquuran mushkiladda aan dhexjibaaxayo. Aragti aan la mid ahayn tii Raskolnikov ee doqonnimada iyo fulaynimada ahayd. Aragti ugub ah oo ii bidhaamisay ka dhabaynta yoolkayga iyo doonista noloshayda. Aragti haddii aan ficil u beddalo iga yeelaya nin guulaystay, oo ka dhabeeyay doonistiisi iyo hammigii nolosha adduunyada.

Aragtidaasi waxa ay ahayd sidan: haddii la i xiro oo dhawr sannadood oo xabsi ah la igu xukumo waxa aan helayaa kansho aan ku akhriyo buugaag farabadan iyo waqti aan jaamacadda ku dhammeeyo muddo gaaban. Sidaa oo kale xabsigu waxa uu ii oggolaanayaa kansho aan buugaag badan ku qoro. Sidaa daraaddeed, waa in aan sameeyo fal-dambiyeed culus oo dhawr sannadood oo xabsi ah aan ku mudan karo.

Cabbaar goortii aan ka fekerayay nooca fal-dambiyeedkaasi noqon karo ayaa waxaa igu soo duxay in fal-dambiyeedka ugu habboon ee dhawr sannadood oo xabsi ii diri karaa yahay dhac bangiyeed (bank robbery). Waxa aan xusuustay in aan caddaanka dalkan lacagta laga la kaftamin sidaa aawadeedna aanan xataa u baahnayn in aan bangiga dhaco ee keliya aan u baahan ahay in bangiga iigu dhow aan tago aniga oo hub iska dhaafe aan cirbad sidan dabadeedna shaqaalaha bangiga aan ku cabsi geliyo haddii aysan lacag i siin in aan dhibaatayn doono.

Aad baan fekraddaa uga helay oo ugu khushuucay, markaa ayaan niyadda iska iri: alleylehe doqon ma tihid sidii Raskolnikov, ninkii si uu yoolkiisa uga dhabeeyo habarta dilay. Ninkii iska dhaadhiciyay in dilka miskiintii Lizaveta uu yoolkiisa ku xaqiijin karo. Alla muxuu doqon caaq ah ahaa! Habar iyo gabadh miskiin ah ayuu dilay.

U ma baahni in aan habar dilo si aan u yoolkayga u gaaro. Waxa keliya ee aan u baahan ahay waa in aan damaaciyo dhaca lacagta caddaanka dabadeedna inta ay khalkhalaan oo nin halis ah ii maleeyaan bay dhawr gu' oo xabsi i laqsiinayaan. Dabadeedna aniga oo caalim ah ayaan xabsiga ka soo baxayaa; markaa ayaan dunida barayaa in Frederick Nietzsche nin waalan ahaa Eebbe na uusan dhiman oo weli nool yahay abidkiina noolaan doono. Markaa ayaan dunida u caddaynayaa in Plato kabbashada falsafadda ku kadsoomay kadinkeedana uusan dhaafin. Waxa aan jeelka ka soo baxayaa aniga oo dunida baraya kitaab-gaablowsyadii Hegel iyo Fukuyama iyo gefafkii ay taariikhda ka galeen.

Waxa aan naftayda u sheegay in xabsiyada Australia aysan hoteel saddex xiddig ah ka liidan waayo waxa aan sheeko ku maqlay in xabsiyada laga helo wax walba oo nolosha u baahan tahay sida cunto, qol hurdo oo leh koronto, telefashan, internet; goob jimicsiga, maktabad akhris, waxbarasho jaamacadda aad doontid aad dhigan karto, garoonno ciyaaraha kala duwan lagu dheelo, iyo waxyaabo kale oo badan. Xataa waxa aan naftayda u sheegay in xabsiyada Australia leeyihiin shaqooyin mushaar lagu siinayo.

Waxa aan naftayda u laqimay in cilladaha keli ah ee xabsigu leeyahay ay yihiin cidlo, kelinnimo iyo waqti farabadan, sidaa awgeed ayaan naftayda xusuusiyay hadalkii Albert Camus ee ahaa *“qofka hal maalin noolaaday, dhib la'aan boqol sannadood buu xabsi ku noolaan karaa, waayo waxa uu dhaansan yahay xusuuso ku filan oo uu cidladda ka dugsan karo/a Man who had lived only one day could easily live for a hundred years in prison. He would have enough memories to keep him from being bored.”* Markaa, haddiiba xusuuso keliyihi boqol sannadood gudaha xabsiga kugu maaweelin karaan maxaad u malaynaysaa adiga oo boqollaal buug helaya jaamacadna baranaya?

Waxa kale oo aan naftayda u sheegay in galista xabsigu tahay sida keliya ee aniga iyo Muna ku kala faataxaysan karno. Waxaa maankaygu isbarbardhig ku sameeyay guurka Muna iyo xabsiga dhabta ah dabadeedna waxa aan qalinka ku duugay in guurka Muna xabsi abadi ah ka daran yahay labada xabsi, kan Muna iyo kan dhabta ah uu kan dhabta ahi raandhiis badan yahay.

Ugu dambayn, waxa aan arrin ku gunaanaday in Isniintaba aan bangiga iigu dhow ku jarmaado. Waxa kale oo aan go'aansaday in aanan qofna la hadlin, xataa Muna iyo Jane ilaa iyo inta aan hawlgalka ku guulaysanayo.

Sidaa markii aan talo ku gebegebeeyay baa hal mar culayskii iyo walhaddkii i saarnaa iga duuleen oo farxad, raynrayn iyo fudayd aanan beryahan arkini i saaqeen, dabadeedna waxa aan furay oo akhris ku bilaabay farriimihii aan saddexda beri ka cabsanayay. Waxa aan akhriyay tobannaan farriimood oo mid Jane ka timid ku jirto. Farriinta Jane waxa ay u dhignayd: *“hi Jama are you alive? Hope you are doing well.” “Dear Jane I am doing very well, and you? I’ve been a bit busy. I’ll be free next weekend,”* ayaan Jane ugu jawaab celiyay.

Muna ka ma mid ahayn dadka farriimaha ii soo diray. Aad baan ugu diirsaday in Muna aysan farriin ii soo dirin waayo haddii ay sidaa yeeli lahayd feker iyo welwel aanan diyaar u ahayn baa igu furmi lahaa.

Dabadeed inta aanan miiskii bunka ka istaagin baan xusuustay in ay maanta Jimce ahayd sidaa daraaddeed aniga oo faraxsan baan go'aansaday in caawa qayilo dabadeedna inta aan qayilayo aan hawlgalka Isniinta si fiican u sii tifaftiro.

Inta aan gurigii u lugeeyay dabadeedna baabuurkii qaatay baan gurigii qaadka lagu iibin jiray afka saaray, weliba taleefan iska sii hor mariyay oo awal hore labo majood baan cuni jiray waxa aan ballansaday marduuf afka ka xiran.

8

Aroor Isniin ah sagaalkii subaxnimo oo daqiiqado dhimman baan soo istaagay laan bangi bangiyada Australia kuwa ugu waawayn ka mid ahi ku lahaa suuq gurigayga wax yar u jiray. Waa bangi si wacan ii garanaya, maxaayeelay intii aan Australia joogay oo dhanba bangi kale macmiil u ma noqon. Bangiga waxaa la furaa sagaalka aroornimo, sidaa awgeed, kolkii aan tagey tobaneeyo qof oo in bangiga la furo sugaya ayaa kiyuu ku jiray.

Waxa aan gashan ahay luungadheere kaaki madow khafiif ah, shaati caddays ah iyo jaakad buluug tiq ah, iyo ookiyaale kuwo qorraxda ah oo madow. Gacanta midig waxa aan iigu jira moobeelka gacanta tan bidixna buugga Viktor Frankl ee *Man's Search for Meaning*.

Sagaalka subaxnimo markii goorsheegtii garaacday baa irdihii bangiga la ballaqay. Dabadeed, markii dhawrkii qofood ee iga horreeyay mid walba gabadh dariishad yar ka soo jeeddaa qaabbishay baa tu yar oo aan filayo in ay asal ahaan Shiinays ahayd inta i soo eegtay tiri: "next please." Markii aan u tagey bay tiri: "how can I help you Sir?" Inta aan afka u dhaweeyay sidii qof ku sirqarsanaya ayaan ku iri: "give me all the money you have otherwise I will harm you." Horay baan erayadaa u soo xifdiyay, gaar ahaan erayga "*harm*" si gooni ah ayaan u soo xushay waayo ma doonayn in aan adeegsado erayga "*kill*" maxaayeelay ma doonayn in la ii xabbiso "iskuday dil" ee wax aan doonayay in la ii xabbiso "iskuday dhac".

Markii aan arkay in aysan warkayga dhab u qaadan ayna indhaha taagtaagayso ayaan mar labaad ugu celiyay aniga oo markan si xooggan oo caro ka muuqato u hadlaya indhahana ku gubaya: "yes I am serious, give me all the money you have otherwise I will harm you, I am f... serious!" Si halhaleel ah ayay lacag toban-toban kun isugu xiran miiska dariishadda u soo dhoobtay. Dabadeed dhawr tallaabo ayaan dib uga degay aniga oo indhahaygu ayada ku foogan yihiin si ay iigu malayso bangidhace inkaar qabe ah, laakiin aan doonayn in aan lacagta far saaro. Hal mar baan si feejignaan leh dhinacyada iyo gadaal u eegay mase dadkii bangiga ku jiray oo dhami illinka ayay isku sii buuranayaa oo naftooda la baxsanayaan. Waan dareemay in gabadha ii waabsani batoonka xaaladaha degdegga ah riixday.

Qiyaastii labo daqiiqo markii ay lacagtii soo qufaysay aniguna aan bartii liqdaaran ahay baan mar qur ah maqlay "ha isdhaqaajin, gacmaha kor u taag, xabadka dhulka dhig! Si dhakhso ah baan

amarkii ku fuliyay. Waxaa xigay askari oo si naxariis darro ah qoorta jilib iiga saaray iyo mid kale oo si xoogsheegad ah ii garbaduubay dabadeedna ii jeebbeeyay.

“I am not a criminal! I kill nobody! I am not a murderer! Why are you torturing me?” Aniga oo ku cataabaya ayay inta kor ii la boodeen oo shaatigaygi madaxa ii galiyeen oo i tukhaantukhiyeen shabaqle bannaanka bangiga u yiil igu tureen.

Qiyaastii saacad iyo bar baan aniga oo jeebbaysan shabaqlihii dhex aallay. Katiinadda tagoogaha iiga roorsan xanuunka ay igu haysay waxaa iiga darnaa xanuunka iyo kaarka aan ka dareemayay labada garab ee gacmaha la garbaduubay. Waxaanba moodayay in garbaha iyo cududuhu kala siibteen. Intii aan shabaqlaha dhex iil waxa keliya ee aan ka fekerayay waxa uu ahaa xanuunka garbaha iyo katiinadda igu roorsan, iyo buugaagta aan xabsiga ugu tagi doono.

Dabadeed shabaqlihii waa uu dhaqaaqay cabbaar dabadeedna waxaa iriddii shabaqlaha lagu ballaqay gudaha saldhig boliis, ka dib inta labo askari i dejiyeen oo qol nalal badan ka daaran yihiin i geliyeen bay garbaduubkii iga u fureen dabadeedna inta labadayda gacmood soo wareejiyeen bay katiinaddii si sidii hore ka naxariis roon iigu xireen. Dabadeed inta kursi igu fadhiisiyeen bay waraysi jirdil iyo maanxanuujis ah igu bilaabeen. Sooyaalkii noloshayda oo dhan bay fatasheen, maalintaan dhashay ilaa saacaddii aan bangiga tagey bay qodob-qodob u dul istaageen. “U ma baahnidiin in aad waxaa oo su’aalo ah waqti iyo tamar isaga lumisaan. U ma baahnidiin baaritaan iyo dabagal dheer. Waan qirsan ahay in aan dambile ahayd ee xabsiga i geeyay. Abidkay dambi kale ma gelin ma na soo helaysan ee waxba waqtiga ha iska luminina ee xabsiga i geeya. Xataa u ma baahnidiin in aad maxkamad i geysaan waayo anigaaba hortinna ka qirsan dambiga aan galay ee xabsiga i geeyay,” ayaan aniguna ku celcelinayay.

Lix saacadood oo waraysi cadaab ah ka dib inta ay shabaqlihii igu celiyeen bay jeel i geeyay dabadeedna waxa ay igu tuureen qol aad ciriiri u ah oo aan dariishad laga neefsado lahayn. Qolku waa ku haawanaya oo aan waxba dhex oollin, sariir, kursi iyo buug midkoodna haba sheegin. Dusha ayay iga ha qufuleen. Neefta ayaa igu dhagtay, waan neeftuuray oo dhididay ka dib na wareeray. Moobeelkaygi iyo buuggii meel kuma sheego. Saacad ii ma xirna sidaa daraaddeed maalin iyo habeen mid ay tahay ma ogi. Harraadka dhuuntu i la qallashay baa iga ga daran.

Waxaa xusuus iigu dambaysay aniga oo dhammaan dushayda dhididku qooyay oo sidii qof buurta Daalo orod ku fuulay u neeftuuraya. Aroortii xigtay baan soo baraarugay aniga oo labo askari i dul fadhiyaan oo midkood caag biyo ah igu qulaaminayo. Markii aan miyirsaday bay xoogaa maraq ah iyo jab rooti ah ii keeneen markii aan cunayna aniga oo jeebbaysan bay shabaqlihii igu tuureen.

Waxa ay i geeyeen maxkamadda degmada oo dad boqol ku dhow dhex fadhifadhiyaan. Markii Xeerilaaliyaha dawladdu dambiyadii la ii haystay oo tobaneeyo ah akhriyay baa nin cad oo suud madow iyo taay xirani inta uu istaagay dambiyadii la igu oogay daadafeeyay, dabadeedna xaakimkii maxkamadda ayaa i faray in aan istaago ka dib na i waydiiyay in aan dambile ahay iyo in kale (guilty or not guilty). Mahadnaq maxkamadda sharafta leh ka dib waxa aan xaakimkii u sheegay in aanan garanayn weligayna filin ka daawan ninka cad ee difaacayga u istaagay, sidaa oo kalena uusan jirin qof aan u wakiishay in uu ii qareemo. Intaa ka dib waxa aan xaakimkii u sheegay

in aan dambile ahay laakiin aanan gelin tobanka dambi ee Xeerilaaliyuhu taxay dambiga keliya ee aan galayna yahay iskuday dhac bangi. Ugu dambayn waxa xaakimkii aan ka codsaday in uu igu xukumdo ciqaabta xeerku u jideeyay dambiga aan galay xabsigana ii diro. Dabadeed xaakimkii waxa uu xiray fadhigii maxkamadda asaga oo xeerilaalinta faray in ay muddo 72 saacadood ah ugu keenaan caddaymaha dambiyada ay igu soo oogen. Intaa ka dib inta shabaqlihii la igu riday ayaa qolkii la igu celiyay.

Labo maalmood oo labo sannadood u dhiganta markii aan qolkii mugdiga ahaa ku xabbisnaa buugaagtii aan dartood dambiga u galayna aanan il saarin ayaa barqadii maalintii saddexaad waxaa ii timid Jane oo foolkeeda murugo buuxisay. Qolku waxa uu leeyahay labo albaab oo kan kore bir adag yahay halka kan hoose ee gudaha xigaana yahay biro shabaq ah. Askarigii waxa uu furay albaabkii kore markaa ayaa aniga iyo Jane oo shabaqii noo dhexeeyo iswaraysannay. Jane foolkeeda yaab iyo amakaag iyo murug ayaa ka muuqday. Laakiin markii aan u sheegay sababta aan dambiga u falay bay qosol la dhacday ayay oo rumaysan la' warkayga. Runtii markii hore qof waalan bay i moodday balse markii ay aragtay in ay dhab iga tahay bay si falsafadaysan ii la doodday. Waxa ay igu tiri “nacas baa tahay. Xorriyaddu waa darka ugu dambeeya ee bini'aadanku geeddiga u yahay. Waan shaqaynaynnaa si aan xabsiga baahida uga baxsanno. Waan guursannaa si aan xabsiga waalidka iyo kelinimadana uga fakanno. Xabsiga keliya ee bini'aadanku ka fakan la'yahay waa xabsiga dabeecadda (nature) kaana dhimashada ayaa naga fakisa. Laakiin adiga sidee ayaa garaadkaagu kuugu qurxiyay in aad nin addoon u noqoto oo uu ku xabbiso? Wax kale kugu ma tilmaami karo aan ka ahayn in aad waalatay.”

“Waxaas aad daldashay gebigooduba dabaacadda ayay ka mid yihiin sida aad qirtayna dhammaanteen dabeecadda ayaan addoomo u nahay,” baan Jane ugu jawaabay.

Dood dheer ka dib Jane waxa ay qashinqubka ku shubtay oo ii dacaraysay aragtidiisii aan iska dhaadhiciyay ee jeelka i keentay. “Adiga oo xor ah wax aad qabsan wayday iyo guul aad gaari kari wayday adiga oo maxbuus ah ma gaaraysid,” bay hadalkii iigu gunaanadday. Dabadeed waxa ay igu qancisay in ay qareen ii qabato ka gadaalna damaanad lacageed ay maxkamadda iga dhigto si la ii sii daayo ka dib na aniga oo bannaanka jooga la ii maxkamadeeyo.

Markii Jane iga tagtay askarigiina albaabkii waynaa kor iga ha qufulay baan feker dheer galay. Feker iyo isla hadalka aan maalintaa naftayda la galay weligay asaga oo kale horay u ma arag. Waxa aan dareemay, markii aan fekerayay in aan dhammaan tuuray oo maankayga ka saaray wax alle waxii feker iyo xusuus horay maankayga ugu jiray keliyana aan diirradda saarayay xaalka aan markaa ku sugnaa. Saacado badan oo khilaawayn ah ka dib waxa aan is arkay aniga oo far murugsatadayda sagxadda shamiintada ah ku xarxarriiqaya ku na qoraya hadalkii Carl Jung ee ahaa: *“My soul! My soul! Where are you? Do you hear me? I speak, I call you, are you there?”*

Ruuxdaydaay kumee? Kumee kuma arkee, kuu waashaye kumee?

Maalintii xigtayba Jane boqol kun oo doollar bay damaanad u dhigtay isla galabkiina waa la i siidaayay. Maalintii xigtay markii aan maxkamadda tagtay baa xaakimkii na faray in dhakhtar saykoolojiiste ah la ii geeyo. Markii saykoolojiistihii aan uga warramay sababta aan dambiga u galay in ay ahayd keliya in aan helo kansho aan buugaag badan ku akhriyo waxna ku qoro aad buu marna u yaabay marna u qoslay. Ugu dambayn saykoolojiistihii waxa uu soo qoray warqad uu xaakimka ugu sheegayo in xanuunka qulubku i haleelay balse aysan xaaladdaydu halis ahayn.

Toban maalmood ka dib maxkamaddii ayaa la iiga yeeray. Caddaymaha ay xeerilaalintu keeneen keliya waxa ay noqdeen in aan gabadhii bangiga ku amray in ay lacag i siiso. Xeerilaalintu waa caddayn waayeen in aan lacagta qaadan rabay iyo in kale, maadaama aan anigu horay ugu dooday in ujeeddadaydu aysan ahayn in aan lacag dhaco ama qaato. Waxa kale oo xeerilaalintu ku fashilmeen keenista cid igu markhaati furta. Halka docda kale maxkamadda laga hor akhriyay tobannaan warqadood oo dad i yaqaannay soo qoreen ku na sheegayaan in ay la yaabeen dambiga loo sheegay in aan galay ayaga oo ku adkaystay aqoonta ay ii leeyihiin darteed in aanan ahayn nin fal-dambiyeed noocaas ahi ka suuroobo. Dadka warqadaha soo qoray waxaa ku jiray Muna, Jake iyo maamulayaashii shaqadayda. Jake waxa uu warqaddiisa maxkamadda ku yiri “inkasta oo Jaamac saaxiibtay Jane iga boojiyay oo saaxiib xun igu noqday haddana waxa aan qirayaa in qof ahaan iyo dabci ahaanba uusan ahayn ruux fal-dambiyeed dhac iyo burcadnimo ahi ka suuroobo.” “In uusan maskax ahaan fiyoobayn baan filayaa” ayuu sii dabadhigay.

Toban beri ka dib baan mar kale maxkamaddii xaadiray aniga oo Jane i la socoto. Maalintan waxa keliya ee maxkamadda aan u tagnayd waa dhagaysiga go’aanka maxkamadda iyo xukunka ay igu ridday, in aan dambile ahay oo xabsiga la ii diro ama dambilaawe xor ah ahay. Jane aad bay u walaacsanayd u na welwelaysay balse anigu inkasta oo aanan sidii hore xabsiga u rabin haddana wax welwel iyo walaac ah kama qabin in dhawr gu’ oo xabsi ah la igu rido.

Maalintan hoolka (hall) maxkamaddu waa buuxay oo boqollaal qof oo weriyayaal ku jiraan baa fadhifadhiyay. Cabbaar markii aan fadhinnay baa xaakimkii soo galay, dabadeedna inta loo istaagay oo madaxyada la foorarshay baa fadhigii lagu noqday. Dabadeed xaakimkii waxa uu taxay dambiyadii xeerilaalintu igu soo oogtay. Intaa ka dib waxa uu akhriyay go’aankii maxkamadda. Markii xaakimku bilaabay akhrinta go’aanka maxkamadda ayaa Jane kolkoshayda midig wejiga gashatay halka labadeeda gacmood ay midna garabkayga bidix si xooggan ugu cantoobisay midda kalena bawdadayda midig ugu tuujisay si ay isu moogaysiiso go’aanka xaakimka oo aysan oddorosi karin midka uu noqon doono.

Xaakimkii waxa uu mid mid u daadafeeyay oo daaqadda uga tuuray dambiyadii xeerilaalintu igu soo oogtay ilaa ugu dambayn uu qodobkii u dambeeyay xeerilaalinta ku raacay, kaa oo ahaa khalkhalgelin goob ganacsi iyo u hanjabid shaqaale. Qodobkaa dambe ayaa wax dambi ah la igu helay waxaana maxkamaddu igu xukuntay saddex boqol oo saacadood oo shaqo bulsho (community work) iskaa wax u qabso ah iyo lacag shan kun oo doollar ah taa oo ah kharashkii fadhiyadii maxkamadda.

Markii xaakimku hadalkii dhammeeyay baa Jane inta alalaas ku dhufatay igu soo boodday oo isku kay duubtay. Ilaa hal daqiiqo ayay igu duubnayd ama aan iskuduubnay.

Waxa aan maxkamaddii ka soo baxnay aniga iyo Jane oo weli iskuduuban. Inkasta oo waxii dhacay iyo waxii aan sameeyay dartood aan dareemayay sidii oo aan tacsidaydi ka qayb galay, haddana waxa aan maxkamadda ka soo baxay aniga oo dareemaya in aan ruuxdaydi helay.

Lix bilood ka dib waxaa bartamaha Gaalkacyo looga alalaasay meherka aniga iyo ruuxdayda, Jane Scott oo imminka ina-ayaheeda oo buuxaa yahay Jane Scott Guuleed.

Dhammaad

Maarso, 2023